Somali

# XUQUUQDA IYO MAS'UULIYADA ARDAYGA

2015-16

## Dugsiyada Dadweynaha Seattle

TUSMADA BUUGGA


| | |
|---|---|
| Hordhac . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . | 3 |
| Xuquuqda ardayga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . | 4 |
| Mas'uuliyadda ardayga . . . . . . . . . . . . . . . . | 5 |
| Anshaxa ardayga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . | 5 |
| Qeexitaano . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . | 6 |
| Awooda shaqaalaha degmada. . . . . . . . . . . . . . | 10 |
| Qodobo aan la oggolayn . . .. . . . . . . . | 10 |
| Dhaqan xumada reeban . . . . . . . . . . . . . . . | 11 |
| Denbiyada degmada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . | 28 |
| Ku caawin hawlgal... . . . . . . . . . . . . . . . . . . ..…. | 33 |
| Dhaqan ka baxsan dhismaha . . . . . . . . . . . . . . . . | 33 |
| Xeerka dugsiga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . | 34 |
| Qaabka Xaqsiinta ardayga . . . . . . . . | 36 |
| Cayrinta muddo yar . . . . . . . . . . . . . | 37 |
| Habka rafcaan qaadashada . . . . . . . . . . . . . . . | 38 |
| Eryidda muddo dheer iyo ka saaridda . . . | 39 |
| Marxadalaha rafcaanka . . . . . . . . . . . . . . . . . . | 41 |
| Eryid deg deg ah iyo amni uga saarid | 43 |
| Marxadalaha rafcaanka . . . . . . . . . . . . . . . . . | 44 |
| Rafcaanka Guddiga sare . . . . . . . . . . . . . . | 46 |
| Anshaxa tacliinta arday khaas ah……… . . . . | 48 |



GUDDIGA SARE EE DUGSIYADA SEATTLE

Stephan Blanford – Sherry Carr – Marty McLaren – Harium Martin-Morris –Betty Patu—Sharon Peaslee—Sue Peters

KORMEERAHA GUUD

Dr.Larry Nyland


Waxaa loo soo jeediyey 2015-16

# QODOBADA HOGAAMINTA MUHIMKA U AH DHISIDDA KALSOONIDA, XIRIIRINTA IXTIRAAMKA DUGSIYADA DADWAYNAHA SEATTLE

Waxbarashada ugu fiican waxaa la helaa marka bii'addu tahay nabadgalyo iyo hubaal. Waxan aamisannahay ardayda, shaqaalaha xubnaha qoyska ee waalidka/wakiilada ay si wadajir ah u wada shaqeeyaan sida ay u noqdaan macalin iyo barayaal ayna is-dhexgalaano. Mabda'a foojignaanta dhaqanka, fikirka dhaqanka, nabadgalyada, kalsooni, ixtiraam, daacadnimo, ka mas'uul ah iyo ku dhaqanka gargaarida isku mid ahaanshaha u dhaxeeyo hubinta waxbaridda ardayda.

Habka kala duwanaansha mujtamaca u adeego danaha guud ee ardayda si loogu hubin lahaa cimilo waxbarasho fiican. Runta foojignaanta dhaqanka iyo fikirka dhaqanka ee ixtiraama kala duwanaanshaha, kaas oo ku tusaaya cilmiga dadka, habka, qaabka ka turjumaaya luqadda, qiimaha, aragtida, ujeedooyinka, isticmaalka khayraadka, heerka qiimeynta.

Mabda'dayadani waxay wakiil ka yihiin dhaqanada aduunka iyo xaqiijinta cadeynta u muhiim ah ixtiraam aadamiga iyo sida loo darajeeyn lahaa dhamaan isla ekaashaha.

Si loo helo cimilo waxbarsho iyo nabadgalyo ku haboon ardayda dhamaan nawaaxiga Dugsiyadda Degmadda, in aynu dalacsiino si naxariis leh xariirka ka dhaxeeyo ardayda, shqaalaha, iyo waalidka/wakiilada/xubnaha qoyska kuwaas oo daryeelaaya qodobada soo socdo:

| | |
|---|---|
| Amniga: | Sameynta nabadgalyada waxqabadka jirka iyo maskaxda shaqsi ahaan iyo dadka kale. |
| Kalsoonida | Daacadnimo, ixtiraamka wadajirka iyo isku-tiirsanaan. |
| Ixtiraamka | Isticmaalka dabiicadaha ixtiraamka; tusida kala duwanaashaha dulqaadka; tusida tixgalinta ra'yiga fikradaha iyo dareemka |
| Daacadda | Noqo mid leh run, daacadna ah. |
| U Xil-saaran | Ogolaasha natiijada aad dooratay; samey waxa aad tiraahdo in aad sameyneysid; isticmaal nafsadaada u hagi laheyd; fikir ka hor ficilkaaga; samey waxa ugu fiican. |
| Xaq ah | Raac sharciyada; wada qaybsashada; maskax furan; maqal dadka kale. |

**U DIIDIS**

Dokumeentigaan waxaa loo isticmaalay erayo ama fasiraad dadka qaarkood wax u dhimaayo. Waalidka waa in ay ka celiyaa isticmaalka caruurta yar in ay akhriyaan dokumeentiga iyadoo la kormeereynin.

Dokumentigaan waxaa loogu talo galay in aad ka hesho akhbaaro ku saabsan akhlaaqda ardayga, fulinta dokumeentiga xubnaha shaqqalaha waxaa ogolaaday Gudiga Sare ee Siyaasadda, Qaabka Maamulka iyo heshiiska maamulka si wada jir ah isugu raaceen. Haddii aad qabto wax ku khuseeya shaqada iyo shaqaalaha, fadlan la soo xariir maamulaha ama kormeerayaasha shaqaalaha.

# HORDHAC

*Xaquuqda iyo Mas'uuliyada Ardayga* ee sharciyada iyo qaynuunka Dugsiyada Dadweynaha Seattle oo ku saabsan akhlaaqda ardayda, aadaabta, xuquuqda iyo waajibaadka. *Xaquuqda iyo Mas'uuliyada Ardayga* waxaa loo abuuray in ay waafaqsan tahay sharciyada Gobolka iyo ururada looga baahan yahay lagana rajeenaayo. Waxaa ku arki doontaa buugga war-bixinta qaybta tixraaca ah qaynuunka sharciyada Qodobka maamulka Gobolka Washington (WAC 392-400), kaas oo waafaqsan sharciyada Gobolka maamulka in uu isticmaalo waxqabadka saxitaanka (tusaale, aadaabta cayrinta iyo joojinta) ardayda dugsi kastaba ee degmadda.

Sharciyada, qaynuunka, iyo habka qaabka loo raacaayo *Xaquuqda iyo Mas'uuliyada Ardayga* waxay khusaysaa dhamaan ardayda, waxaana loogu talagalaay in ay difaacaan xubnaha jaaliyadda waxbarashada. Sharciyada waa in ay waafaqsan yihiin oo ay raacsan yihiin qaynuunka ku shaqeeya maamulka Dugsiga Degmadda. kuwa ka mid ah laakiin la aan xadidin, hubitaanka caafimaadka, iyo nabadgelyada ardayda iyo shaqaalaha iyo daryeelka qaabka waxbarashada. akhbaaraha Sharciyadaan waxaa loo sameeyey in lagu dhiirrigelin dabiicada hore bulsha iyo in lagu saxo dabiicaha xun-xun oo faragelinta ku sameeynayaan waxbarashada. Taas waxaa abuuraysaa gaaritaanka cilmiga wanaagsan oo waxbarasho ah, waxay sameeyneeysaa heer dabeecad qeexan, ardayda in ay ogaadan arimaha laga filayo, xoog-saarida horumarinta aadaabta, taas oo foojignaan siinayso shaqsiyaadka, fasalka iyo guud ahaan faragelinta dugsiga ka hor inta ardayda dugsiga lagu cayrin ama laga joojin. Waxaynu waalidka ku dhiiragelinaynaa in ay u sharaxaan ubadkooda sharciyada iyo arimaha ku xiga haddii ay jebiyaan sharciga.

Waxaa si toos ah ugu gudbinaysaa *su'aaladaha* ku saabsan *Xaquuqda iyo Mas'uuliyada Ardayga* iyo fasiraada Xafiiska Akhlaaqda "Discipline Office, Seattle Public Schools, MS 31-177, P.O. Box 34165, 2445 3rd Avenue South, Seattle, WA 98124-1165, taleefoonka 206-252-0820". Su'aaladahaada waa lagaaga jawaabayaa ama waxaa loo gudbinayaa maamulka ku haboon. Siyaasada Gudiga Sare ee dugsiyada waa loo gudbinayaa tixraaca *Xaquuqda iyo Mas'uuliyada Ardayga* in ay muraajacad ku sameeyaan Xafiiska Akhlaaqda ama u gudbinaayo Dugsiyada Degmada Seattle goobta shabakada www.seattleschools.org.

Dugsiyada Degmada Seattle waxaa kaloo daabacaday oo ay qaybisaa warqadaha "Sal-dhigyada sharciyada Dugsiyada Degmada Seattle" warqadahaa waxaa la siinayaa dhamaad ardayda dugsiyada goorta bilawga sanad[1] dugsiyeed kastaba

| |
|---|
| Dokumeentigaan wuxuu ka gooban yahay seddex qaybood: (1) Xaquuqda iyo Mas'uuliyada Ardayga, (2) Qodobada aadaabda ka mamnuucan, iyo (3) Akhbaarta rafcaanka iyo qaabka loo raacaayo aadaabta ardayga. Goorta ardayga la cayriyo ama laga joojin, waalidaka/wakiilada waxaa la siinayaa cinwaanka qaybta "Rafcaanka Aadaabta Ardayga: Akhbaarta iyo Qaabka." Waalidka/wakiilada waxay codsan karaan dhamaan ama qayb ka mid aha dokumeentikaan. Dokumeentikaan oo dhan waxaa ka helaysaa Dugsiyada Degmada Seattle goobta shabakada www.seattleschools.org/area/discipline |

1 WAC 392-400-225

# XUQUUQDA ARDAYGA

- Ardayda waxay xaq u leeyihiin XORNIMO U HADALKA, shaqsikastaa wuxuu cadaynayaan fikradiisa. Xornimadu ma kuu ogolaaneyso in aad dadka kula dagaalanto, ku dhaarasho, hanjabaad xoog-muujin, ama faragelinta dadka kale xuquuqdooda.
- Ardayda waxay xaq u leeyihiin bannaan-baxyo nabadgalyo ah, isku imaasho aan faragelin ku sameyneyn hawlaha dugsiga ama fasalada.
- Ardaydu waxay xaq u leeyihiin codsi wadajir loo qoro marka maamulka dugsiga ay filayaan in aanay u daryeelin si cadaalad ah.
- Ardaydu waxay xaq u leeyihiin xornimo u wareysi, waxay warqado u qori karaan shaqsiyaadka fikradahooda. Ardaydu waxay ka mas'uul yihiin waxay qoraan ama daabacaan, ayagoo ku cadeynaya qoraalada magacooda. Ma loo oggolo in ay sameeyaan shaqsiyaad in ay weeraraan ama daabacaad dad wax-loogu dhimaayo ama ashyaa fuxshi.
- Ardaydu waxay xaq u leeyihiin in aan sabab la'aan la baari Karin ama xoog lagu qaban Karin xilliga ay joogaan dugsiga. Dhamaan difaaca daryeelka, waa in la raacaa sharciyadaan soo socdo:

- Waxaa la sameeyaa baaritaan guud oo hantida ka hor inta la ogeysiin, kana mid ah baaritaanka sanaadiiqda dugsiga iyo miisaska.
- Ashyaada ka mid ah hubka qarxa, hubka kale rasaasta qaraxda, iyo waxyaalaha kale suurta galka ah oo wax u dhibaayo nabadgalyadda ama arimaha joojinaaya qaabka waxbarashada waa laga qaadayaa oo lagala wareegayaa.
- Guud ahaan, baaritaanka shaqsi ahaan ardayga (uuna aheyn baaritaanka jirka[2]) ama hantida ardayga waa la sameyn karaa haddii ay jirto tuhun burcadnimo ah ama akhlaaq- daro baaritaanka waa in uu yahay mid macquul ah oo aan xoog aheyn loona fiiriyo da'da iyo jinsi ardayga. Dabiicada baarida waa in ay ku xiran tahay tuhun akhbaaro ku saleysan baaritaanka.

- Ardaydu waxay xaq u leeyihiin fursad waxbarasho oo siman. Ardayda ma lagu sameyn karo midab kala soocid kana mid ah asalka wadankiisa, jinsiyada, midabka, diinta, heerka dhaqaalaha, jinsiga, hanuuninta galmada, aqoonsiga jinsi, uurnimada, heerka guurka, dambiyaha hore, xabsiyeyntii hore, qaabka jirkiisa, ama miirka ama cuuryaanimada. Kala duwanaataa waa inaan ardayga loo adeegsan ama aan loo isticmaalin si loo ogaado heerka waxqabadka ardayga.
- Ardaydu waxay xaq u leeyihiin xornimada diinta[3]. Ardayda waxay xor ka yihiin Fikradaha in lagu hago ama lagu dhiirageliyo Diin gaar ah fikradooda goorta ay ka qaybgalayaan dugsiyada degmada ama hawlaha waxqabada dugsigu maalgaliyo haddaan arday lagu fiirinaayo[4] maadada oy kormeeraayaal kormeerayaan dugsiga degmada.
- Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay inuu macalimka ka helo casharo iyo layli guri inta uu dhamaysanayo eriga dugsiga laga caydhiyey. Waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in laga caawiyo siday ugu soo noqon lahaayeen dugsiga ugana qaybqaadan lahaayeen casharada iyo dhacdooyinka le ee fasalka.

---

[2] Sharciga Washington (RCW 28A.600.230(3)) **baaritaanka dharka ardayga ka mamnuuc ah** ee maamulka dugsiga iyo shaqaalaha ka wakiil ah hoos imaanaayo kormeerkooda. "Baaritaanka Dharka" waxaa loo fasiray si guud "ka saarida dharka qaar ka mid ah, goob gaar ah ama dhamaan jirka oo dhiga si baaris loo sameeyo xubnaha taranka, dibada, dharka hoos laga xirto ama naasaha haweenka."

[3] WAC 392-400-227

[4] Sharciga Hogaanka Dugsiya ee No. 3240

## MAS'UULIYADAHA ARDAYGA

Ujeedada qaabka dugsiyada dadweynaha waxay tahay in ardayda la siiyo fursad xirfad waxbarasho, raadin cilmi, iyo horumarin dabiicad u hogaaminayso in aan ku shaqeyno waajibaad iyo gaaritaanka qaangaarnimada. Si loo gaaro himilooyinka arday kastaaba waa in uu qaataa waajibaadka qof ahaaneed:

- Waa in uu go'aansadaa dadaalka waxbarashadda;
- Waa inay macalimka waydiistaan gargaar haday fahmi kari waayaan casharada;
- Waa in oo ka qaybgalaa dhamaan fasalada oo dhan maalin kastaba waqtigooda, diyaarna u yahay shaqo, soona qaataa dhamaan ashyaada waxbarashada, buugta, qalinka iwm;
- Tixgalinta xuquuqda dadka kale;
- Iska ilaali qeexitaanka shaqsiyaadka cadaalo daro ku ah shaqsiyaadka iyo kooxaha;
- Raacitaanka qaabka waxbarashada macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga;
- Waa inuu dugsiga ka raadsado qof wayn oo uu kala hadlo wixii dhibaato ah eek a hortimaada waxbarashada si uu ugu raadiyo gargaar lagaga caawiyo dhibaatada ka hortaagan waxbarashada;
- Waa inuu kala shaqeeyaa ardayda kale, macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga sidii loogu adkayn lahaa nabadgelyada dugsiga arday kasta.
- Garashada iyo raacitaanka sharciyada Dugsiyada Degmadda iyo kuwa u gaar ah dugsiyadda;
- Oggolaanshaha saxitaanka suurta galka ah ee jabitaanka sharciyada dugsiga ama sharciyada dugsiga degmadda;
- Isku eegitaanka aqoonsiga haddii shaqaalaha dugsiga weydiiyo;
- Lagu soo lebisto dhar ku haboon dugsiga dhibaatana u keeni karin nabadgalyada ama caafimaadka ama carqaladaynsameyn karin iyo
- Ixtiraamka hantida dadka kale, iyo dugsiga. Ardayda waxaa looga baahan yahay in uu dib u bixiyaan ama gudaan hantida uu khasaaraha [5] ku sameeyey.

Dhammaan ardayda waa in ay raacaan siyaasadda, sharciyadda, iyo qaynuunka dugsiyada degmadda. Ardaygii raaci waaya sharciyada qoraalka iyo qaynuunka waxaa lagu qaadayaa akhlaaq-daro goorta ay joogaan degaanka dugsiga, gaadiidka dugsiga maalgeliyo, ama waxqabad dugsiga maalgeliyey. Ardaygii raaci waayo sharciyada qoraalka iyo qaynuunka waxaa lagu qaadayaa akhlaaq-daro ama waxyaalo kale oo leh xaqiiq ah ama la xariira in ay hakiyaan hawlaha degmadda, kana mid ah laakiin aan la xadidin dhowritaanka caafimaadka, iyo nabadgalyada ardayda iyo shaqaalaha iyo ilaalinta habka waxbarashada una hageysa aqoonta.

Shaqaalaha dugsigu waxay fahamsan yihiin inuu ardaygu mararka qaarkii ku sugan yahay xanuun xaga maskaxka ama jidhka ah oo ka dhashay dugsiga, guriga ama meel kale. Shaqaalaha dugsigu waxay ardayga ku dhiirigalinayaan inuu xaaladiisa la wadaaqo dadka u xilsaaran arintan dugsiga sida lataliyaha ardayda. Dugsigu wuu ogyahay inaan waxbarasho dhici karin marka ardaygu ku sugan yahay xaaladan. Sidaa darteen waxaa shaqaalaha dugsiga ka go'an inay arday kasta ka caawiyaan siduu uga gudbi lahaa xaalada lasoo gudboonaatay.

---

[5] Xasuusin: RCW 28A.635.060 Dugsiga Degmada Seattle wuxuu oggolaaday in uu ka hayo dhibcaha fasalka, shahaadada, qoraalka-daabacan dhibcaha arday kastoo lumiyo ama gooyo ama ka bedalo qaabka, ama dhibaateeya hantida ay leeyihiin Dugsiyada Degmada, qandaraaslaha degmada, shaqaalaha ama ardayda kale ilaa ardayga ama waalidka iyo wakiilada ardayga ka bixiyaan qasaarada oo geestay. Goobta ardayga ama waalidka iyo wakiilada ardayga ay bixin waayaan qasaarada ubadkooda geesteen, degmada waxay sameeyneysaa barnaamij qorsho ah oo iskaa wax-u-qabso in oo ku shaqayo ardayga si uu isaga mago qasaarada uu geystey. Marka ardaygu uu dhameysto shaqada iskaa wax-u-qabso ah, degmada waxay siinaysaa ardayga dhibcaha fasalka, shahaadada, qoraalka-daabacan dhibcaha. Arday kasta ama waalidka iyo wakiilada ka cabanaayo qodobka lagu soo oogay ee kor ku qoran waxay xaq u leeyihiin in ay codsadaan qaybta Qaabka Cabashada Akhlaaqda, WAC 392-400-240.

Tilaabada akhlaaq-daradu ee xaaladaha aadka u khatayta ahi waxay keeni kartaa mid ka mid ah u diidida ka qaybgalka waxqabadka dugsiyadda, u diida raacitaanka gaadiidka degmada iyo gaadiidka dugsiga maalgeliyo, ku joojinta ama cayritaanka dugsiga.

## ADAABTA ARDAYDA

Ujeedada qaabka dugsiga waxay tahay dhamaan ardayda in ay siiso waay oaragnimo waxbarasho u oggolaanaysa xirfad horumarin, tartan iyo akhlaaqda haboon oo saldhig u ah gaaritaanka ardayga waajibaadka wadaninimada. Si loo gaaro ujeedadaas sare, waxaa waajib ah in arday kastaaba waxbarto raaco sharciyada iyo qaynuunka u qoran Degmadda, iyo in la sameeyo sababo lagu saxaayo qaladka sharciyada lagu xadgudbay. Dhamaan ardayda oo dhan waa in ay waafaq san yihiin siyaasadda, sharciysda iyo qaynuunka degmada. Diidmada in la raaci waayo sharciyada iyo qaynuunka qoraalka oo ay sameeyeen maamulka dugsiga waxay keeni kartaa akhlaaqdaro, cayrin ama ka joojinta dugsiga. Ujeedada looga danleeyahay sharciyada qoraalka waa in lagu hubiyo in qaladka loo saxo si wanaagsan iyo qalad la saxo si cadaalad iyo sinaan oo asluub leh. Si looga difaaco qaladka aan habooneyn, waana waajib arday kastaba in uu sameeyo. Rafcaanka waxaa loo abuuray dhibanaha in uu helo fursad qaladka lagu saxo si muraajo loogu sameeyo maamulka si loo helo kalsooni ka dhexeeyso ardayda iyo waalidka waana mid aad u muhiim ah maamulka shaqaalha dugsiga.

## FASIRAADA

Qaybtaan soo socota waa kuwo ugu muhimsan dokumeentigaan

Qaybta Rafcaanka: Waalidka, wakiilada, ama ardayda isticmaalayaan qaybaha rafcaanka laga helo tix raac xeer lambar WAC 392-400 muranka diidmada aadaabta, ama waxqabadka saxitaanka uu bixiyey ardayda Dugsiga Dadweynaha Seattle.

Beddalaada Goobta: Ka saarida goobta waxbarashada ardayga waxbarashada gaarka ah in ka badan maalmaha dugsiga 10 beri oo xariirt ah; ama ka saarida maalmo xariir ah oo garaysa muddo maalmaha dugsiga 10 beri sanad dugsiyeedka. Qiimeynta qaabka ka saarida iyadoo loo fiirinaayo xaaladba xaaladaha kale.

Aadaabta: Ujeedada dokumentigaan, dhammaan foomam-ka waxqabadka saxida, iyadoo saldhig looga dhigaayo dugsiga ama natiijada cayrinta ama dugsi ka joojinta.

Dambiyada Degmadda: Dabiicadaha faragelinta joojin ku sameynaayo qaabka waxbarashada. Dambiyada Degmada waa rabshadaha lagu jebinaayo sharciyada lagu horumarinaayo in lagu caawino qaabka waxbarashada ee dugsiga, una diidaayo awooda macalimiinta in ay waxbaraan aradayga.

Raacdeynta Deg-Dega ah: Si dhaqso ah ka saarida ardayga dugsiga isagoo dabiicad xun sameeyo maamulka dugsigana aaminsan yihiin oo haysto sababo fiican ama suurtagal ah joogitaanka aradayga ay keeni karto khatar nafsadiisa ama dadka kale ama handadaad iyo faragalin ku tahay qaabka waxbarashada dugsiga. Haddii ka joojinta deg-dega ah la baryo, waxaa la fulinayaa joojinta ilaa laga gaaraayo xiliga rafcaanka. Raacdeyyn deg-dega ah waxay qaadaneeysaa in aan ka badneeyn 10 maalin dugsiyeedka ah.

6 WAC 392-400-210

Akhlaaq Xumida ka Reeban: Dabiicada keenta cayrinta dambiga koowaad. Akhlaaq xumida dambiyda ka

reeban waa dambi gelin. Xukunka loo raacayo akhlaaq xumada reeban waxay ku xusan yihiin Heerka Xukunka Akhlaaq Xumada Reeban eek u lifaaqan warqadan.

Cayrinta: Cayrintu waa akhlaaqdaro rasmi ah oo ardayga ugu soo laaban karaan dugsiga gaarka ee Degmada ardayga oo dhiganayey. Haddii cayrinta ay tahay Degmada, ardaygu uma soo laaban karo dugsiga ama barnaamijka uu leeyahay Dugsiyada Dadwaynaha Seattle mudo dhan hal sanad dugsiyeed7.

Ardayga wuxuu xaq u leeyahay in oo helo la kulanka qodobka RCW 28A.600.022, iyadoo jadwal loogu sameeyo 20 bari gudahooda waqtiga ardayga la cayriyey.

U-Cayrinta Guriga "Qol dugsiga ku yaal" (Sal-dhiga Dugsiga): Dugsiyo badan ayaa doortay in ay isticmaalaan si ay ku saxaan ardayga sida xun ugu dhaqmay dugsiga ama hawlaha waxqabadka dugsiga waqti gaaban la cayriyo loona diro gurigooda qol gooni ah. Ardayga waxaa la siinayaa shaqada guriga iyo tababar xirfada bulshada si ardayga looga caawino mustaqbalka aadaabta. Waxayna noqon kartaa hal xiso fasalka ah ilaa muddo maalmo ah.

Qaabka Waxbarasho ka Duwan oo ku Meel Gaar ah (IAES): Arimo la xariiro hubka, muqaadaraadka ama khamriga, shaqaalaha dugsiga wuxuu amraayaa in wax laga bedalo waxbarashada ardayga leh waxbarashada gaarka ah "curyaanka" looga bedalo qaabka waxbarshada ka duwan oo meel gaar ah oo ku haboon lehna waqti la mid ah waxbarashada waxna u dhimaynin akhlaaqdaradaas laakiin mudada maka badnaan karto 45 maalmood. Qaabka waxbarashada ka duwan oo ku meel gaar ah waxaa loo doortay in uu sii wato horumarka manhajka guud, xilliga ku sii meel gaarka kale, ardaygu waa in uu helaa hawlaha waxbarashada oo dib loo habeeyey lana soconaaya barnaamijka (IEP) si ardayga uu la kulmo ujeedooyinka loogu talagalay ee IEP.

Awooda Wax Xukumida: Maamulka dugsiga awood uma laha in uu faragaliyo akhlaaq-daro ka dhacday ardayga dugsiga goob ka baxsan, maamulku wuxuu ka shaqaynayaa:

(1) Dugsiga gudihiisa, goobaha lagu ciyaaro dugsiga, iyo meelaha meelaha kale dugsiga u caadiga ah

(2) Sida goorta baska dugsiga la saaran yahay, iyo dhamaan wax-qabadka dugsiga la xariirto ama maalgeliyo. Xaaladaha qaarkood, maamulka dugsiga wuxuu awood u leeyahay in uu soo farageliyo dhacdooyin ama wax-qabad ka baxsan goobta dugsiga.

(3) Si loo sameeyo arintaas, waa in ay jiraano arimo u dhexeeya iskuna xiraaya dhacdada iyo dugsiga.

(4) Dhacdada waa in lagu cadeeyaa xariirka dugsiga ay la leedahay haddii dhacdada ay keeni karto caafimaad daro iyo nabadgalyo la'aan ardayda iyo shaqaalaha ama ay wax u dhimayso cimilada degaanka waxbarashada la xariirto.

(5) Hadii arinta ka dhacday meel dugsiga ka baxsani ay raad ku yeelanayso amaanka dugsiga (sida ardayda oo dugsiga ka cabsoota arintan awgeed. Tiiyoo loo baahdo in ardayda iyo shaqaalaha dugsiga nebedgalyadooda si gaara loo ilaaliyo dhacdadan awgeed. Tiiyoo dugsiga dhexdiisa lagu gaadho balamo lagu kala gadanayo daroogo dugsiga dibadiisa, arintan oo sababi karta in arday dhigata dugiyo kale yimaadaan dugsiga oo ay rabshado ka sameeyaan.

(6) Degmadu way soo faro galin doontaa marka uu arday ka hanjabo meel dugsiga ka baxsan kuna dhawaaqo inuu dugsiga rabshad wax u dhinta waxbarashada iyo nabadqabka dugsiga ka dhex fulindoono.

7 Waxa guud ahaan dugsiga laga eryi karaa ardayga hadii lagu qabto hub. Sida ku xusan xeerka gobolka (fiiri xeerka kormeeraha guud ee 3248SP, habka loo maro si ardayga dugsiga loogu soo celiyo halsano ka bacdi.

8 Darogada la xakameeyey, waxaa loola jeedaa daroogooyinka ku xusan xeerarka I, II, III, IV, ama V ee qaybta 202© ee xeerka daroogada la xakameeyey ee xeer (21 USC & 812©)

Maamulka dugsiga awood uma laha dambiga ka dhaca dugsiga goob ka baxsan, dugsiga waxaa laga rabaa

in ay warbixinta u gudbiyaan hay'adaha sharciga fuliyo. Hase ahaatee, waa in maamulka awood u leeyahay in uu dhexgelo haddii dhacdadu aysan aheyn dabiicad dambi ah.

Cayrin Waqati-Dheer: Cayrinta ka badan 10 maalmood kana yar 90 maalmood. Dugsiyada Dadweynha Seattle, ardayga waxaa lagu soo ogaagayaa cayrin waqti-dheer, wuxuuna u soo laabanayaa dugsigiisa waqtiga uu dhamaado muddada cayrinta. Ardayga wuxuu xaq u leeyahay in oo helo la kulanka qodobka RCW 28A.600.022, iyadoo jadwal loogu sameeyo 20 bari gudahooda waqtiga ardayga la cayriyey.Tababarka ugu fiican wuxuu yahay in dib loola kulmo lana siiyo jadwal iyadoo warqad Notice of Disciplinary Action loo diraa guriga. Ardayda dugsiga hoose lama cayrinkaro wakhti dheer. Ardayda dugsiga saree e wakhtiga dheer la cayriyo waxaa lagula talinayaa inay ka qaybqaataan barnaamijka dibu usoo noqoshada si ay tacliintooda usii wataan.

Go'aan Cadaynta: Waa in muraajaco lagu sameeyaa farqiga u dhaxeeya ardayga waxbarashada gaarka ama ardayga curyaanka ah ee ku xusan (504) iyo dabiicada keeni karta akhlaaq xumi. Haddii natiijada muraajacada dabiicad aan ku xirnayn facilka ardayga curyaanka ah ama arday ku qoran waxbarasho gaar ah, ardayga waxaa loo edaab marinayaa sida ardayga kale oo la mid ah wuxuuna helaya ciqaabta dambiga uuu galay.

**Dhexdexaadin:** Waa in dugsiga iyo ardayga ama waalidka/wakiilku gaadhaan heshiis wax ka badalaya edbinta ardayga iyo siduu wax uga badalayo. Waa in ardayga iyo waalidka/wakiilka ay aqbalaan in dhamaan arimaha la xidhiidha edbinta ardaygu ay yihiin kama go'aan aan hadal danbe laga keeni karin. Ardayga iyo waalidka/wakiilku wax racfaana kama qaadan karaan dhacdadan. Arjiga dhexdexaadinta isticmaalka daroogadu waa Nuqulka A, araajida dhamaan dhexdhexaadinta arimaha wali waa Nuqulka B.

**Ogaysiis Waxa lagu abaalmarinayo**: Warqad laga soo saaray PowerSchoolka ayaa lagu ogaysiinayaa waalidka/wakiilka danbiga ardaygu galay iyo waxa lagu abaalmarinay.

Ogaysiiska Waalidka/Wakiilada: Waalidka/Wakiilada waxaa lagu ogeysiinayaa taleefoon ama qoraal qoorta arday akhlaaqdaro dugsiga looga cayriyo ama laga joojiyo waqti-gaaban ama waqtidheer.

Horumarinta Asluubta: Xubnaha shaqaalaha dugsiga waxaa laga rabaa in ay isticmaalaano keliyah sixitaan ficil aan laheyn iyo wax dhibaato ah, suurta galna ah in ardayga asluubta xun in lagu habeyn karo akhlaaqdiisa. Haddii ardaygu ku soo cel-celiyo anshax xumida, shaqaalaha waxay ku soo oogayaan ciqaab iyo tilaabo adagna xanibaada dugsiga si loo saxo asluubtiisa xun.

Suurta-gal Ficil Jirka oo Xoog ah: Isticmaalka qiyaas ficil jirka oo xoog ah ee maamulka dugsiga, macalinka, shaqaalaha dugsiga ama dadka iskaa wax-u-qabso ah si looga hortago in ardayda isku geysto dhimaato nafsadiisa ama ardayda kale, shaqaalaha dugsiga /ama hantida. Ficilkaas jirka ee xooga ah ma loo tixgalinaayo ciqaabta jirka sixitaanka wax-qabadka[7]

Qabashaha markale Shirka[11]: Ardayga leh cayrinta ama joojinta muddada dheerw waa in loo qorsheeyaa jadwalka shirka markale ka hor inta ardayga dugsiga ku soo laaban si looga cawino ku soo laabashada dugusiga in oo ku guulaysto. Ardayga, waaildka/wakiilada iyo shaqaalaha dugsiga kuwa ku haboon waa in ay ka qaybgalaano shirkaan. Qorshaha ugu fiican ee ardayga dugsiga la cayriyey waxay tahay in markale lala shiro isla markaana jadwal loo sameeyo waqtiga cayrinta/joojinta iyo taariikhda talo soo jeedinta oo ku qoran Notice of Disciplinary Action. Shirka waa in loo qorsheeyaa jadwalkiisa 20 maalin waqtiga cayrinta/joojinta. Xiliga shirka waa in oo leeyahay qoraal qorshaha dib u habeeynta ardayga horumar loogu sameeyn lahaa isla markaana iyadoo la tixgalinaayo foomanka kale wax-qabadka lagu saxaayo ardayga, sida inuu arko kaansulin, laguna sameeyo edbin hagaajinaysa, cawinaato ka-hortaga dhibaatada iyo cawinaata ardayga ee tilaabaha muhiimka ah oo lagu hagaajinaayo wax-qabadka xaaladaha keeni karo in ay u horseedaan waqtiga cayrinta/joojinta.

Barnaamijka Did-u-diiwaangalinta: Waa Barnamijka degmada ee ardayda dugsiga sare lagu siinaayo dib u habeeynta qaabka akhlaaqda ama asluubta iyo maadooyinka waxbarashada ardayga leh cayrinta ama joojinta muddda dheer dugsiga ardayga oo sameeyey dambi ku xadgudbin ah iyadoo ay ku qoran tahay qaabka Standard Disciplinary Action for Exceptional Misconduct. Ku soo laabashada dugsiga caadiga ah, ardayga waa in oo helaay shirka markale ka hor inta oo dugsiga u soo laaban si oo u helo cawinaad fiican oo dugsiga ugu guulaysanaayo.

Ugu Saarida Nabad-gelyada: (fiiri, Ka Saarida Deg-Deg ah.) Ka saarida deg-dega ah ardayga ee dugsiga sababo caafimaad /ama nabadgalyo. Hay'adda Ilaalinta iyo Nabadgalyada waa in ay qiimayaan dhibaatada khatarta iyo hanjabaada, una sameeyaan qorsho nabadgelinaaya goobta ka hor inta loo oggolaan ardayga in uu ku soo laabto dugsiga.

Xannibaad: Wax-qabad lagu saaxaayo in lagu hagaajiyo asluub xumida ardayga, kana mid ah saldhiga ka-hortaga dugsiga, cayrinta waqti gaaban ama dheer, joojinta dugsiga, ama degmadda. *Fiiri,* Akhlaaqda.

Maalmaha Dugsiga Laga Shaqeeyo: Maalin kasta jadwalka taariikhda Dugsiyada Dadweynha Seattle wuu u furan yahay dadweynaha inay ka qaybgalaano haddaanay ahayn xilliyada fasaxa iyo ciidaha.

Kooxda Qiimaynta Handadaada Dugsiga (STAT)": Hay'adda Ilaalinta iyo Nabadgalyada waxay bixisaa hawlo baaritaan ah kooxda loo tababaray si ay u qiimayaan awooda gafka iyo khatarta ardayga ku soo socoto iyo cadaynta xaaladaha iyo asluubta ardayga horay loogu yaqaanay kuna xiran rabshadaha iyo gardarada dagaalka ardayga.

Ka Xanibidda Sannadka Dugsiga: Ugu xanibida akhlaaqdarada dugsiga ardayga lagu soo oogey hal sano cayrin ah ma u sii gudbayso sanadka xiga akhlaaqdiisa, waxna uma dhimayso horumarkiisa haddii aysan jirin arimo lagu saxaayo sanadka dhamaadkiisa. Ujeedada loo sameeyey horumarinta anshaxa, maamulka dugsiga ma tixgalinayaa dambiga dhacay ka hor 180 maalmaha dugsiga la soo dhaafay, ilaa mooyee mid ka mid ah noocyada handadaada rabshadaha.

Cayrinta Waqti-gaaban: Waa cayrin aan ka badneyn (10) maalin oo isku xigta maalmaha dugsiga. Dugsiga Dadweynaha Seattle, ardayda waxaa la siinayaa cayrin waqti-gaaban si caadi ahna dugsigiisa ugu soo laaban karaa goorta oo dhamaato xiliga cayrinta.

Ardayda Waxbarashada Gaarka ah: Ardayga wuxuu xaq u leeyahay hal ama in ka badan qodobada loogu baahan yahay curyaanimadda qaybta cadayneysa WAC, una baahan waxbarida gaar ah oo loo qorshayey.

Dadweynaha Gaarka ah: Dadweynaha gaarka ah kana mid ah ardayda waxbarashada gaarka ah iyo ardayda qaybta Section 504, ardayda oy xadidan tahay ku hadlidda Luqada Ingariiska (LEP).

Cayrinta: Ardayga horay looga joojiyey si rasmi dugsiga in oo dhigta in muddo waqti ah, kana mid aheyn ardayda dugsiga looga reebay si rasmi aheyn ujeeddo "akhlaaq-daro ah". Ardayga la cayriyey ardayda ma loo ogolaanaayo in ay yimaadaan hantida ay leedahay ama ay kormeereyso dugsiyada ama degmada ama goobaha looga qaybgalo waxqabadka dugsiga, tiiyoo maamulaha dugsigu u ogolaaday mooyaane. Ardayda la cayriyey 15 wakhti ka yar 15 cisho waxay codsan karaan inay dugsiga keenaan layliga guriga. Mar hadii ardayga la cayriyey aan loo ogolayn inuu yimaado dugsiga waa inuu qof kale usoo qaadaa soona celiyaa layliga guriga.

10 WAC 392-400-235(3) (a)

11 RCW 28A.600.022

Sharciga Tobanka-Maalin: Ka saarida dugsiga waxay quseysaa ardayda aan laheen curyaanimada, shaqaalaha dugisga waxay amar ku bixinayaa in ay dugsiga ka saaraan ardayda waxbarashada gaarka ah haddii ay jabiyaano sharciga dugsiga mana ka bedali karo 10 maalin isku xigta wadarta cayrinta. Haddii ay

ka badnaato 10 maalmood, Dugsiga Dadweynaha Seattle waa in ay bilabaan siinta hawlaha waxbarashada maalinta 11 xilliga dugsiga laga saaray.

Soo Gudbinta Qiimaynta Hanjabaada: Waxay la xidhiidhaa marka ardaygu sameeyo hanjabaad khatara ama la xidhiidha galmood ama akhlaaq xumo xoogan inkastoo laysku dayey in caawiyo ee dugsiga looga cayriyo si degdega. Marka lasoo gudbiyo qiimaynta hanjabaada waxaa loo gubindoonaa kooxda u xilsaaran qiimaynta hanjabaadaha. Waa in qorshe loo sameeyaa lagu maaraynayo ardayga intaanu dugsiga ama degmada kusoo noqon. Cayrinta degdega ah ardayga iyo waalidka/wakiilku waxay ka qaadan karaan racfaan la xiriira Shuruucda Gobolka[12].

## AWOODDA SHAQAALAHA DEGMADA

### Dadka maamulka shaqaalaha awooda u leh akhlaaqada ardayda[13]

1. Gudiga Sare Dugsiyada macalimiinta shahaadada leh, maamulka dugsiga, darawalka baska iyo shaqaalaha kale oo u xil saaray awoodna u siiyey in ay ku soo cayrin ardayda jebiso sharciyada dugsiga degmada. Qaar ka mid ah shaqaalahaas waxay ardayda ka saari karaan lagu soo oogey akhlaaqdaro deg deg ah fasalka, maadooyinka ama waxqabadka.
2. Gudiga Sare Dugsiyada macalimiinta waxay ka saaraan fasalka ardayda sameyso arimo hor-istaagaayo habka waxbarashada kuna lid ah heerka dabiicada dugsiga inta ka hartay maalinta dugsiga ilaa maamulka ama macalinka ay ka falanqoodaan dhacdada. Xaalada deg-deg ah mooyee, macalinka waxaa laga rajeynayaa in uu isku dayo hal ama in ka badan inuu saxo akhlaaq-darada. Arimaho si kastaba ha u dhacdo, ardayga ma loo oggolaanaayo in uu ku soo laabto xisada fasalka macalinka haddanu oggolaansho siin.
3. Gudiga Sare Dugsiga wuxuu u ogolaaday maamulayaasha dugsiga, ku-xigeeynka maamulaha dugsiga iyo dadka kale in ay ku soo ogaan cayrin waqti-gaaban, cayrin waqti-dheer, ka saarid, ka joojin deg-deg ah iyo joojin.

### Xaaladaha iyo Xadidnaanta Anshax marinta[14]

Arday kasta oo ku xad-gudbqa sharciyada degmada dugsiga waxaa lagu soo oogayaa dacwad, taas oo waafaqsan xaaladahaan:

1. Maamulka Dugsiga Dadweynaha Seattle ma loo ogolo ciqaabta jirka ee ardayga. Ciqaabta jirka ka mid ma'aha qodobada soo socdo:

a. Xoog isticmaalka jirka oo suurta gal ah oo sameeyo maamulka, macalinka, shaqaalaha dugsiga ama dadka iskaa-wax-u-qabsayaasha taas muhiim ah in lagu habeeyo qaabka ama loogu hortegaayo in arday uu dhibaato isku geysto nafsadiisa, ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga ama hantida;
b. Xanuun jirka ama ku haboon ama keento natiijo ka timid tababaro ciyaareed ama ka qaybgal tartan orodo ah, wax-qabad ciyaaraha si xur ah u sameeyey ardayga;
c. Ku dirqin jirka ah oo ardayda oo dhan ka qaybqaateeyn si toos ah macalinka fasalka ugu hogaamiyey wax-qabadka, kana mid ah laakiin la xadidin waxbarashada ciyaaraha, jiidooyinka, mashaariicda waxbarashada ee machadka; ama
d. Ku celinta jirka qaybna ka ah barnaamijka maamulka akhlaaqda ardayga barnaamijka waxbarashada shaqsiyaadka kaas oo waalidka ogolaaday lana fuliyey si raacsan sharciyadda oo ansixinaayo qaynuunka gobolka.

## QODOBKA KA MAMNUUC AH IN LA SAMEEYO

Waxaa loo isticmaalayaa dokumeentgaan sida soo socoto: Caadooyinka ku dhaqanka ayaa loo isticmaalayaa dokumiintigaan. Cinwaanka dambiga qodobka waxaa lagu qorayaa midab aad u madoow. Waxaana isla markaana la raacinayaa fasiraada dambiga. Haddii jumlad dheeraad ah ka hooseyso oo leh astaanta “xiddiaga”, jumladaas waxaa loo qeexayaa si tafa-tiran ama fasiraad ku saabsan saxitaanka wax loogu qabanaayo, ama goorta dhacdada habka akhlaaqda horumar ku haboon aysan sameyn, maamulka wuxuu bilaabayaa in uu ku saxo ciqaab arday oo waafaqsan Degmadda heerarka u ansaxiyey.

---

OGAYSIISKA ARDAYDA IYO WAALIDKA LOOGA BAAHAN YAHAY
QODOBKA SHARCIGA ISBAHAYSIGA KA MADAX-BANAAN MUKHAADARAADKA

DUGSIGA IYO BULSHADA EE 1989 Dugsiga Degmada Seattle waxaa ka mamnuuc ah oo sharci daro ah in ardayda haystaan, isticmaalayaan, ama qaybiyaan mukhaadaraadka iyo qamriga dugsiyada ama qaybaha dugsiga wax-qabad ka socdo. Fulitaanka sharcigaan waa qasab, ardayga raaci waaya mamnuucida waxaa laga eryayaa ama laga joojinayaa dugsiga muddo dheer. Haysashada ama isticmaalka mukhaadaraadka iyo cabitaanka qamriga waa qalad, waxayna wax u dhibayaan caafimaadka iyo waxbarashada. Degmada waxay bixisaa ama u diyaarinaysaa la-talin, dhaqan-celin iyo barnaamijka dib u habaynta; akhbaaro kale la xariir maamulaha dugsiga ubadkaaga ama la-taliyaha dugsiga.

.

---

## DHAQANKA XUMADA QAYRUL CAADIGA AH

Heerka akhlaaqda dhibaatayn koowaad oo mid kastoo Ka-reebitaanka Dhaqanka Foosha Xun waa looga joojin dugsiga Hay’adaha Nabadgelyada iyo Ilaalinta amniga waa in la ogaysiiyaa dhibaateynta denbiga qaybtaan. Haddey ku habboon tahay, Ciidamada Booliiska Seattle waa la ogaysiinayaa.

### E-100 Ashyaada Mukhaadaraadka

### E-110 Gaditaanka Cabitaanka Qamriga, iyo Ashyaada Mukhaadaraadka

Gaditaanka, ama isku dayida gaditaanka qamriga, ama ashyaada mukhaadaraadka, kana mid ah cabitaan ku jirto qamriga ama mukhaadaraadka mamnuuca ah. Daawooyinka sida gaarka ah loo iibiyo.

### E-111 iibinta mukhadaraadka mamnuuca ah iyo ashyaada la ilaaliyo

Iibinta, isku dayga iibinta mukhaadaraadka iyo ashyaada la ilaaliyo oy ku jiraan daawooyinka sida gaarka ah loo iibiyo oo aanan la-xadidiniyo ashyaada cuntada si sharci darro ah loogu laaqo mukhaadaraadka iyo qalabka elektarooniga oo budada ah oo ka kooban ashyaada mukhaadaraadka.

**E-112 iibinta sharaabka khamriga:** Iibin, isku day iibin, sharaab khamro, oy ku jiraan sharaabkasta oo khamri lagu laaqay.

*****

Ardayda Dugsiga Sare ee Sharci jebiyaasha waxaa dugsiga laga joojinayaa ugu yaraan inta mudada ka hartay simistarka, ardayda dugsiga dhexe ee sharciga jabisana waxaa dugsiga laga cayrinkaraa ugu badnaan 15 maalmood. Ardayga waxaa looga baahan yahay in uu ka qaybgalo barnaamijka dhaqan-celinta isla markaana keeno qiimeynta ay soo oggolaadeen ee degmadu ansaxisay mukhaadaraadka ku xeel dheer si uu dugsiga caadiga ah ugu soo laabto, qarashkana waxaa bixinaaya waalidka. Sharci jabiyaasha xaq uma laho in laga yareeyo mudada dugsiga laga joojiyey ardayga ka qaybgalka barnaamijka dhaqan-celinta mukhaadaraadka iyo qamriga oggolaaday. Haysashada cadad yar (in ka badan cadad loo malaynaayo in qof shaqsiyaad ah kaliyah isticmaalaayo) haysashada ashyaada la mamnuucay waxaa loo qaadanayaa in aad isku dayeyso in aad iibiso.

Ardayda dugsiga waxaa dhici karta in dugsiga laga xanibo gelida dembiga koowaad iyadoon la siin digniinta akhlaaqda xilliga la aamisan yahay xaqiiq sababa suurta gal ah in dembiga qaabkaas ah aan la sixi karin haddii laysku dayo. Aradyga dugsiga laga xanibo waxaa looga baahan yahay in uu ka qaybgalo soona dhameeyo barnaamijka dhaqan-celinta isla markaana keeno qiimeynta ay soo ogolaadaan khabiirada shaqaalaha ee mukhaadaraadka ku xeel dheer, si uu dugsiga caadiga ah ugu soo laabto, qarashkana waxaa bixinaaya waalidka. Sababaha wanaagsan oo macquulka ah oo shaqaalaha dugsiga aamisan yahay oo aan wax ku sixi karin waxaa ka mid ah:

- U keeni karo ardayga dhaawac jirka xun ama maskaxda wax u dhimi kara haddii ay tahay xataa mid aan ula kac loo sameyn.
- Ka iibiyo mukhaadaraadka ardayga ka yar da'diisa labo sano ama in ka badan.
- Kana iibiyo mukhaadaraadka ama qamriga ardayga oo abuuri karo in uu waxyeelayo hawlaha ka socdo dugsiga fara-gelina ku sammeeyo wax-qabadka waxbarashada deegaanka.

E-120 Qaybinta Cabitaanka Qamriga, Mukhaadaraadka, iyo Wax-yaalaha lagu Saqraamo Qaybin, fidinta ka qayb qaadashada ama la kulanta goobaha qamriga, mukhaadaraadka ama ashyaada lagu saqraamo, kana mid ah cabitaanka leh qamriga ama daawooyinka lagu saqraamo.

*****

Ardayda Dugsiga Sare ee Sharci jebiyaasha waxaa dugsiga laga joojinayaa ugu yaraan inta mudada ka hartay simistarka, ardayda dugsiga dhexe ee sharciga jabisana waxaa dugsiga laga cayrinkaraa ugu badnaan 15 maalmood.

Dugsiga sare iyo dugsiga dhexe dembiga koowaad, wax dhibaateynt koowaad waa dembi natiijadiisu tahay cayrinta muddo-dheer ilaa uu ka dhamaado simistarka inkastoo maamulka dugsiga uu ka yareyn karo ilaa 11 beri ka dib markuu helo qiimeynta oo ansaxiyey khabiirada isticmaalka mukhaadaraadka & iyadoo la raacaayo talooyinka qiimeeyaha oo waalidka bixinaayo khaarashka. Dhibaateynta ku xadgudubka labaad waxay keenaysaa natiijo cayrin muddo-dheer iyo ardayga oo soo dhameeystiro barnaamijka isticmaalka oo ansaxiyey degmada waalidka bixinaayo kharashka. Dhibaateynta ku xadgudubka saddexaad waxay keenaysaa natiijo cayrin muddo-dheer ilaa uu ka dhamaado simistarka loogana baahan yahay qiimeynta uu ansaxiyey khabiirada isticmaalka mukhaadaraadka & iyadoo la raacaayo talooyinka qiimayaha oy ogolaatay degmadu, waalidka ayaa bixinaya qarashka.
Dhibaateynta ku xadgudubka saddexaad waxay keenaysaa natiijo ka joojinta dugsiga ardayga

Waa in uu dhameeysto barnaamijka isticmaalka mukhaadaraadaka oo ansaxiyey degmada, waalidka ayaa bixinaaya kharashka.

Ardayda dugsiga waxaa dhici karta in dugsiga laga xanibaa gelida dambiga koowaad iyadoo la siin

digniinta akhlaaqada goorta la aamisan yahay xaqiiq sababa suurta gal ah in dembiga qaabkaas ah aan la sixi karin haddii laysku dayo. Aradyga dugsiga laga xanibo waxaa looga baahan yahay in oo ka qaybgalo soona dhameeyo barnaamijka dhaqan-celinta, isla markaana keeno qiimeynta soona ogolaadaan khabiirada shaqaalaha mukhaadaraadka ku xeel dheer, raacaana talooyinka laga baxshey qiimeynta.

Sababaha wanaagsan oo macquulka ah oo shaqaalaha dugsiga aamisan yahay oo aan wax ku sixi karin waxaa ka mid ah:

- U keeni karo ardayga dhaawac jirka xun ama maskaxda wax u dhimi kara haddii ay tahay xataa mid aan ula kac loo sameeyn.
- U qabeyn taama ama u fidinta mukhaadaraadka ardayga ka yar da'diisa labo sano ama in ka badan.
- Ka qaybqaadashada mukhaadaraadka ama qamriga ardayga oo abuuri karo in oo waxyeelayo hawlaha ka socdo dugsiga fara-galina ku sammeyo wax-qabadka waxbarashada deegaanka.

## E-121 Haysashada Cabitaanka Qamriga, Mukhaadaraadka, iyo Wax-yaalaha lagu Saqraamo

Haysashada, isticmaalka, ama wax u dhimaayo cabitaanka qamriga, mukhaadaraadka ama ashyaada lagu saqraamo, kana mid ah cabitaanka leh qamriga, ama haysashada mukhaadaraadka (paraphernalia) kana mid ah laakiin la xadidin iyo qalabka elektarooniga oo budada ah oo ka kooban ashyaada mukhaadaraadka, tubooyinka iyo qalabka gacanta lagu sameeyey

* * * * *

Xaaladaha dhibitaanka ku habooneyn taliyayaasha ururada, tababarayaasha, maamulku oggolaasho siinin ama u sheegin in ay sameeyaan ardayda hawlahaas. Bilawga hawlaha ardayda iskood u doortaan in ay fuliyaan ama goorta ay doonaan in ay joojiyaan waa mamnuuc. Cadeeynta dhibida waxaa ka mid ah, laakiin la xadidin qaybaha soo socdo:

• Sharaf-dilid, ixtiraam-daro, ama dabeecad xaqiraad ama daryeel xumo.

D-230 Ciyaarida Qamaarka

Ciyaarida turubka qamaarka, iyo ciyaarida ciyaaraha lacagta layskaga helo ama shay kaloo qiimo leh lagu tartamo in layska heloo.

D-240 Been-abuurka

Been ka abuurid waalidka ama wakiilada ama dad kale saxiixooda waraaqadaha dugsiga ama dukumentiga nooc kastoo dugsiga leeyahay ama foomka, ama dokumentiga kale ama foomka loo isticmaalo dugsiga. Bedalaada heerka fasalka ama diiwaanka xaadiriska warqada foomka rasmiga ah ee degmada, kana mid ah warqadaha warbixinta xaadiriska iyo fasalka buugga oo ardayga kasta ku qoran yahay iyada oon ogolaasho laga helin maamulka dugsiga.

- Siinta magac been ah goorta qofka la weydiiyo in uu is-magacaabo maamulka dugsiga..[38]
- Siinta akhbaar been ah shaqaalaha dugsiga, ama iska-dhigida qof kale si ficil ah ama qoritaanka been ah ama akhbaaro qalad ah oo ku saabsan xaadiriska ardayga ama maqnaashaha dugsiga kana mid ah, laakiin aanan la xadidin, been abuur maqnaanshaha cudur-daarka leh, u oggolaashaha ardayga in uu horay u soo baxo fasalka ama dugsiga.

D-245 Qishka Qishka ama koobi ka sameynta qof kale shaqadiisa ama soo celinta qof kale waraaqihiisa, mashruuciisa, barnaamijka kombiyuutarka, iyo wixii la mid ah sida adiga in aad leedahay oo kale.

## D-250 Isticmaalka ama Haysashada Ashyaada Tubaakada[39]

Isticmaalka ama haysashada ashyaada ka sameysan tubaakada goobaha hantida dugsiga dadweynaha, kana mid ah laakiin la xadidin iyo qalabka elektarooniga oo budada ah oo ka kooban ashyaada mukhaadaraadka, basaska dugsiga ama meelaha ama dhacdooyinka dugsiga maalgaliyo.

## D-260 Gubida Taxadir La'aanta[40]

Ku ciyaarida ama taxadir la'aanta loo shidid dabka taraqa ama laytarka sigaarka ama walxo kasta oo la shido ama qayb ka mid in la gubo hal warqad fasalka gudihiisa, musqusha, wadada dugsiga gudaheeda, ama meelo kale oo dugsiga ka mid ah oo si dhaqsiyo ah u keenaysa qiic ama ciyaar alaada dabka damiyo.

* * * * *

Waxaa ka mid ah taraqa ama laytarka sigaarka oo la shido iyadoo ciyaar ah oona dab keenin. Wax-kasto dab keenaayo waxaa loo qaadanayaa qarxin dab ah waa in loo yeeraa oo war-bixin la siiyaa si dhaqasi ah Hay'ada Dab-damiska ''.

<u>Nidaamka[51]</u>

<u>Wax-dhibaataynta Koowaada:</u>

- Maamulka dugsiga wuxuu akhbaargalinayaa wax-dhibaataynta ardayga waalidka/wakiilada.
- Maamulka dugsiga wuxuu siinayaa waalidiinta/wakiilada warqada tobaakada "Tobacco-Free Schools, Fact Sheet for Parents/Guardians".

<u>Wax-dhibaataynta Labaad:</u>

- Maamulka dugsiga wuxuu akhbaargalinayaa wax-dhibaataynta ardayga waalidka/wakiilada.
- Ardaygo waa in oo soo qoraa qoraal 2-bugg ah oo ka hadlaayo sida warshadaha tobaakada u bar-tilmaansadaan kooxyaha yay yar iyo siyaabaha habka ay u quseeyso noloshaada.
- Waan qoraalkiisa oo soo saxiixaa waalidka/wakiilada ka dibna loo soo gudbiyaa maamulka dugsiga.

<u>Wax-dhibaataynta Seddexaad</u>

- Maamulka dugsiga wuxuu akhbaargalinayaa wax-dhibaataynta ardayga waalidka/wakiilada.
- Ardayga waa in oo ka qaybgalaa nidaamka ka-hortaga iyo fara-galint iyo la talinta
- Ardayga waa in oo soo dhameeystiraa dokomintiga oo dhan loona soo gudbiyaa maamulka dugsiga.

<u>Wax-dhibaataynta arimaha ku-xiga:</u>

Maamulka dugsiga wuxuu ku soo celin karaa nidaamka wax-dhibaateeynta labaad iyo seddexaad, wuxuu ku qaadi kataa tilaabooyin kale waxqabadka ku haboon.

## D-270 Si Xun u Isticmaalida Kombiyuutarka[41]

Si aan habooneyn u isticmaalida kumbiyuutaradda dugsiga.

* * * * *
Waxaana ka mid ah, laakiin aan xadidneen kuwa soo socdo:

- Galitaanka goobaha Interneetka aan habooneyn, tusaale dadka qaawan.

[38] *Fiiri,* E-520 waxay faragalin ku sameeynayaa Maamulka dugsiga haddii been abuur aqoonsiga qof kale ka dib la baaro ardayga dabiicada xumida.

[39] *Fiiri, Siyaasada Gudiga Sare Dugsiga C09.00.*

[40] *Fiiri,* E-810 **Qarxinta** si ula kac ah u shidida dabka ama u keenida qarxinta.

[41] *Fiiri,* E-720 **Kombiyuutarada** si Qalad ah Loogu Xadgudbo, Xanaag, iyo Qalad loo Isticmaalo

Juun 2009

23

- Keydinta dadka qaawan ama sawiradda galmada ama ashyaada kale Interneetka laguu baneeyn sida dabiicada ama ka hadalka galmada, u gafidda diinta, ciyaal suuqnimo, ku xadgubin, hanuuninta galmada, ama guud ahaan ashyaada ka soo horjeesto qiimaha waxtarka waxbarashada dugsiga dadweynaha.
- Qalabeynta, ku keydinta ama qaybinta koobiyada laguu fasaxin ee ashyaada softiware-ka ama ashyaada kumbiyuutarada Degmadda oo aan maamulka kuu fasaxin.
- Si aan habooneyn u isticmaalida qadka e-maylka ama ku la xariirka Internet kombiyuutaradda Degmadda in aad ku xadgudobto, handadaad, ama aad ku dhibaateyso dad kale.

Isticmaalka kombiyuutarada Dugsiyada Degmada Seattle iyo u fasaxida hawlaha Internet waa faa'iido dheeraad ah oo bixiyey maamulka Degmada cidii ku xadgudubta siyaasada Degmada waa laga joojinayaa isticmaalka kombiyuutarka. Maamulka waxay isticmaalayaan heerka sababaha sal-dhiga u ah da'da iyo heerka xirfada ardayga taas oo lagu qiimaynaayo awooda /ama sameynta ula kac ardayda in la xumeeyo lana jebiyo kombiyuutarada, ama si xun loo isticmaalo kombiyuutarada Degmadda, ama habka kombiyuutarada.

D-280 **Feegaarka ama Sawiradda Darbiga Lagu Qoro**[42] Ardayga waa inuu ka haystaa oggolaansho maamulka shaqaalaha dugsiga in wax ku qoro, masawiro, ku rinjiyeeyo, ku feegaaro ama lagu calaameeyo qoraalo, masawiro ama calaamado kala nooc ah Hantida Degmada ama hantida shaqaalaha ay leedahay ama qofka shaqaalaha

## D-300 Dhibaateyn[79]

### D-310 Riixitaanka, Hanjabaada, iyo Dhibaateynta[43]

Si ula kac ah oo ku celcelis iyo isqarin ah u sameynta qoraalka, oraahda, ama ficilka riixitaanka, hanjabaada, ama dhibaateynta akhlaaq-xumida oo ay ku jiraan kuwa hoos ku xusan kumase hadidna:

- In la khasaysiiyo ama hoos loo dhigo qof kale;
- In la dhaawaco jirdhka qof ama hoolihiisa;
- Mid aad u khatara, soo noqnoqota, oo abuurta in qofka laga cabsiiyo ama loogu hanjabo madasha waxbarasha;
- Inay raadwayn ku yeelato waxbarashada ardayda ama waxbarida macalimada ama

habaynta waxqabadka ardayda;

- Inuu habka waxbarasho ee dugsiga wax u dhimo oo uu khalkhal galiyo.

*****

Ficilka ardayga wax loogu dhibaayo, ama khasaaro loogu geesanaayo hantida ama shaqsiyaadaka, isdaba-joog ah halis keeni karto, ama dhaqso u faafa waxna u dhiba cimilda waxbarashada ama xaq u yeelashada dadka waaweyn barida ama maamulida akhlaaqda ardayg;

- Fara-galina ku sameyneyso waxbarashada ardayda joojin kartana hawlaha dugsiga sida ay ku socdaan.

- Ma looga baahno qofka in uu haysto dabiicada riixitaanka, hanjabaada shaqsiyaadka ama ku xadgudbinta.

- Ardayga in oo ka bilaawo dugsiga kooxyo, heerka fasalka ama xafiiska in oo dhibaateeyo ama wax u dhimaayo ama dabiicad qalifsan oo keenayso ama u dhigmata in ay wax-yeelayso bulshada ama dhibaateeyn maskaxda ah shaqsiga (horay loogu yaqaanay D-210 dhibaateeyn)

## D-315 Ku Xadgudbinta Galmada[82,83]

Si ula kac ku xadgudbinta sababo galmada qof kale ama dabiicado galmada ah oo qofka aan rabin, taabasho, ama oraah faalo ah oo qofka raali ka eheyn, dabiicad handadaad ah ama baad ah.

* * * * *

Ku dhibaateynta galmada iyadoo loo isticmaalaayo erayada ceebayn fool xun ama ujeedo qof kale lagu cambaareynaayo galmada ama kula qaybsanaayo ashyaada daabacaada ee galmada dabiiciga ah ama qalabka casriga korontada kala qaybgalo masawiradda qaawanaanshaha ardayda ama ardayga uu sameeyo cambaareyn qaybo ka mid ah jirka arday kale dugsiga iyadoo loo fiirinaayo halka masawiradda laga keenay ama lagu soo daabacay ama laga soo duubay, laakiin aan la xadidin. “galmeysiga”

[42] *Fiiri,* E-450 Xaasidnimo Kharibaadka wax qoritaanka xun oo keenaayo khasaaro ka badan $100.

[43] *Fiiri,* E-610 Dhibaataynta Xaasinimada Xaasinimada iyo si ula kac ah loo sameeyo kuwo ka mid ariimaha soo socdo iyadoo ku xiran tahay naceebka iyo *fiiri,* RCW 28A.300.285.

[44] Xaaladaha badan oo khatarta, tix-raac E-610.



## D-320 Sameeynta Akhlaaqda darada ku haboon Galmada

Sameynta galmo ku habooneyn in lagu xadgudbo deegaanka cimilada waxbarashada ee dugsiga.

* * * * *

Sameynta galmada waxaa ka mid ah dabiicadaha is-dhunkashada, taabasho galmo oo laysku raacay.

## D-330 Taabashada aan Habooneyn[45]

Taabashada aan la rabin xubnaha taranka qaar ka mid ah qofka kale ee ardayda da'da dugsiga hoose.

*****

Ujeedada dembigaan, ka mid ma'ahan taabashada aan u jeedo lahayn ama mid aan ula-kac aheyn waxaana ka mid ah is-riiriixa ardayda qofka saddexaad lagu dhaco

### D-340 Ku Xadgudbida Oraahda[46]

Aan sameynayn wax la xaqiijiyo, laakiin gaar ah, oraahada, handadaad rabshada sida tooska ah qofka kale loo weeraro, ama isticmaalka erayada qof wax u dhibaayo, sharaf ka ridida, hujuumida, ama cebeynta, qajilida kana mid ah erayada xaasidnimada, edeb-darada, ciyaal-suuqnimada ama magac xun ugu yeerida.

## D-400 Dembiyada Kakan

### D-410 Buntukha iyo Hubka[47] Caruuta ku Ciyaaraan

Haysashada buntukha[48] iyo hubka kale ee caruurta ku ciyaaraan una ekeyn buntukh ama hub run ah; ama hubka xaqiiqda aheyn laakiin si xaasidnimo loo isticmaalay ama loo soo bandhigay.

*****

Qoryaha BB-ga, kuwa naqaska, "naqas fudud", baaskooladaha ama kuwo kale u eg qoryaha ee aan tooyis ahayn waa inaan lagu ciqaabin sharcigan. Isticmaal sharciga nanbarkiisu yahay E-320 Hubka khatarta ah, ee haysashada walxahan.

### D-420 Warbixinta[49] Biinta ah:

Ogaansha been ka warbixinta ama erayo la xariiro dhaqanka xun dad kale oo aan dhicin. Ardayda ka warbixiso xaalado halis ku ah caafimaadka iyo nabadgelyada dadka kale oo deg-deg ah, inkastoo warbixintaa marararka qaarkood loo qaadan karo mid aan la hubin ama mudo ka dib la ogaado in si xaqiiq ah u dhicin. Dembigaan waxaay tahay ujeedadiisa been qayaxan.

## WAXQABADKA DANBIILAHA

Ardayga waxaa mas'uul ahaan lagu soo oogi karaa dambiga qof kale sameeyey haddii ardayga gacan siiyo dambiil sida qof dambi galeeyso. Ardayga gacanta siiyo qof dambiila ah haddii oo aqoon u leeyahay in oo gacan u siiyo galitaanka dambiga, ardayga: (1) iibsashada, amar-siinta, dhiiragalinta, ama codsiga qof kale in ay fuliso dambiga, ama (2) caawino ama ku raaco in oo kaalmeeyo qof kale oo qorshaynaayo ama kukacaayo dambi. Ardayga wuxuu sameeyn karaa dhiirigalin dambi qof kale ficil ahaan hadal ah ama hadal la'aan [2].

Ardayga gacan ma siinaayo dambiilaha haddii asiga ama iyada oo yahay dhibane dambiga, ama asiga ama iyada horay u soo sheegay ka hor dhacdada dambiga ama waqti ku haboon u soo diginama u sheegin maamulka dugsiga inta aysan fulin dhacdada[3] dambiga.

Haddii ardayga oo sameeynaayo ficil gacan siinaayo dambiile, gacan siinta dambiilaha waxaa ardayga lagu soo oogayaa dambigaas mid la mid ah facilka oo sameeyey dambiilaha, waxaan la cadeeynaya in oo gacan siiyey dambiile fulinaayo dambi.

.

[45] *Fiiri,* E-210 Ku Xadgudbinta dabiicada qalifsan.

[46] *Fiiri,* E-240 Hanjabaada rabshadaha oo xaqiiq ah ama ujeedada tahay hanjabaad rabsho ah.

[47] *Fiiri,* E-300 ku xadgudbinta buntukha ama hubka runta ah, ama kuwa caruurta u isticmaalaan xaasidnimo.

[48] *Fiiri,* Buuga Akhlaaqada Fasiraayo buntukha caruurta ku ciyaarto.

[50] *Fiiri, Nidaamka qaabka Gudiga Sare Dugsiyada* No. 4215 Niidaamka Kormeeraha Guud No. 4215SP.

[51] Khayraadka raacsan nidaamkaan waxaa ka helaysaa goobta shabakada degmada dhinaca akhlaaqda.

[49] *Fiiri,* E-910 Warbixinta Beenta ah shil ku lug leh xaasidnimo.

Juun 2009 25

## HEERKA ASLUUBTA WAX-QABADKA

Talooyinka heerka asluubta wax-qabadka waxaa Ka-reeban Asluub-darrada iyo Dembiyada Degmada kana mid ah qodobada ku lifaaqsan Sameynta Qodobada Sharciga Mamnuucaayo. Heerka asluubta wax-qabadka wuxuu u adeegayaa Siyaasada Gudiga sare dugsiga D 71.00 kuna saabsan isticmaalka horumarinta anshaxa.

## BARNAAMIJKA DIB-U-DIIWAANGALINTA

Degmada waxay bixisaa qaabka xirfada ugu fiican ardayda u helo habka waxbarashada looga baahan yahay badalaayo dabiicadaha asluubta xiliga dugsiga laga eryo ama laga joojiyo. Guud ahaan goorta ardayga dugsiga laga eryo ama laga dambiyo fal-xun ah. Barnaamijka Dib-u-diiwaangalinta waxaa ka mid ah qaabka waxbarida cilmiga iyo in oo la kulmoin oo qaado maadooyinka Degmada loola rajeeynaayo badalaayo dabiicadaha asluubta.

### Ardayda Dugsiga Sare

Barnaamijka Dib-u-diiwaangalinta waxaa la siiyaa ardayda dugsiga sare ee sanad dugsiyeedka 2015-16 barnaamijka Interagency Academy. Si loo helo barnaamijkaan sanad kasraba wax yar oo ka duwan ahay iyadoo ku xiran miisaaniyada loo diyaariyey. Sanad dugsiyeedka 2015-16 ardayda dugsiga sare oo loo diro Barnaamijka Dib-u-diiwaangalinta waxaa lagu qorayaa mid ka mid ah goobaha dugsiyada Interagency Academy ama Dugsiga Sare South Lake inta ka hartay simistarka ardayga dugsiga laga eryey ama laga joojiyey. Diiwaangalinta way sii soconaysaa simistarka ku-xiga haddii ay jiraano qaabka waxbarida badalaada asluubta iyo haddii waxbaridaan si hagaasan loo dhameeystirin inta waqtiga ka hartay simistarkaas.

Ardayga dugsiga sare laga joojiyey oo looga baahan yahay in oo soo dhameeystiro badalaada asluubta wuxuu ku soo laaban karaa dugsigii laga joojiyey dhamaadka simistarka taas oo soo dhameeyey waxbarida badalaada asluubta oo lagu qancay. Ardayga dambiga galay oo looga baahneeyn in oo soo maro waxbarida badalaada asluubta wuxuu ku soo laaban karaa dugsigii laga joojiyey dhamaadka isla simistarkaas. Ardayda waxay ku soo laabanayaan dugsiyadooda iyadoo loo qorsheeyey jadwalka shirka[4] ka-hor si looga cawino in oo ku guulaysto waxabarashada. Qaabka ugu fiican wuxuu yahay in loo sameeyo jadwalka shirka dib-u-habeeynta iyo qoraal NDA waqtiga ardayga laga eryey dugsiga.

Ardayda dugsiga laga cayriyo kuma soo laabanayaan dugsiga laga cayriyey, waxaana marka hore lagu qorayaa Barnaamijka dib usoo noqoshada ilaa uu simistarku ka dhamaanayo, ka bacdina dugsiyada kale oo caadiga oo ku haboon si “Qaabka Gaarka OO Diiwaangalinta Enrollment Procedures”. Waa inay banaamijka soo celinta lagu qoaa 10 cisho gudahood marka dugsiga laga cayriyo ka bacdi. Ardayda lagu qoro inay qaataan barnaamijyo dhaqancelina intaanay dugsiga kusoo noqon waxaa lagu qorayaa dugsi ku

haboon tiiyoo la raacayo sharciga. Dhamaadka cayrinta ama dhamaadka simistarka goorta si lagu qanco u soo dhameeystiro qaabaka badalaada asluubta looga baahan yahay, haddii looga baahan yahay dambiga qaabaka badalaada asluubta. Ardayda waxay ku soo laabanayaan dugsi kale iyadoo loo qorsheeyey jadwalka shirka[5] ka-hor si looga cawino in oo ku guulaysto waxabarashada. Dugsiga cusub wxaa loo qorshaynayaa jadwalka shirka dib-u-habeeynta si waxabarashada ardayga u sii-wado dugsiga lagu qoray ka dib marka oo soo dhameeystiro qaabka barnaamijka dib-u-habeeynta.

## Ardayda Dugsiga Dhexe

Ardayda Dugsiga Dhexe oo laga eryey dugsiga waqti-dheer, waxaa looga baahan yahay in ay qaataano maadooyinka habka badalaada asluubta iskana diiwaangaliyaan 15 maalin dugsiga barnaaamijka dib-u-habeeynta. Sanadka 2015-16, barnaamijkaan waxaa laga bixinayaa Dugsiga Sare South Lake. Ardayda waxaa laga rajeenayaa in ay ka qayb-galaano soona dhameeystiraano maadooyinka looga baahan yahay ee waxbarida. Soo dhameeystirka waxbarashada qaabka badalaada asluubta iyo nambarka maalmaha barnaamijka dib-u-habeeynta waa loo baahan yahay, ardayga waqtiga dambe bilaaway ama ka qayb-galin dhamaan 15 maalmood oo barnaamijka oo looga baahan yahay ama maalin kastaba ka qayb-galin wuxuu joogayaa barnaamijka ilaa oo ka helo dhameeystirka lagu qanco15 maalin waxbarida badalaada asluubta. Ardayda dugsiga dhexe oo ka qaybgasho barnaamijka dib-u-habeeynta waxay helayaan waxbarida suugaanta iyo xisaabta, wxayna ka shaqaynayaa howlaha mashaaricda dugsiga laga eryey halkaas si wadajir ah ugu qoran yihiin. Dugsiga dhexe wuxuu warbixinta radayga ee edbintiisa u wareejin doonaa dugsiga Saree e South Shore. Shaqaalaha barnaamijka dib ugu soo noqonta dugsiga ayaa waalidka lasoo xiriiri doona, si ay ula socodsiiyaan wakhtiga barnaamijku bilaabmayo.

Ardayga laga cayriyo dugsiga dhexe oo soo dhameeysto barnaamijka dib-u-habeeynta lagu qancay wuxuu u laabanauaa dugsiga laga cayriyey, iyadoo aysan ku xirneen Notice of Disciplinary Action (NDA) taas oo sheegayso in ardayga laga cayriyey dugsiga dhamaadka simistarka. Goorta ay ardayda ku soo laabanayaan dugsiga laga joojiyey, diiwaanka dugsiga wuxuu sheegayaa nambarka maalmaha dugsiga laga eryey muddada-dheer. Ardayda waxay ku soo laabanayaan dugsiyadooda iyadoo loo qorsheeyey jadwalka shirka[3] ka-hor si looga cawino in oo ku guulaysto waxabarashada. Qaabka ugu fiican wuxuu yahay in loo sameeyo jadwalka shirka dib-u-habeeynta iyo qoraal, wakhtiga dugsiga laga cayriyo iyo taariikhda waa in lagu qoraa Ogaysiiska Xeerka Edbinta.

Ardayda dugsiga laga cayriyo kuma soo laabanayaan dugsiga laga cayriyey, waxaana lagu qorayaa dugsiyada kale oo caadiga oo ku haboon si Qaabka Gaarka OO Diiwaangalinta ” Enrollment Procedures” goorta ay soo dhameeystaan 15 maalin ee barnaamijka dib-u-habeeynta oo lagu qancay. Ardayda waxay ku soo laabanayaan dugsiyadooda iyadoo loo qorsheeyey jadwalka shirka[4] ka-hor si looga cawino in oo ku guulaysto waxabarashada. Dugsiga cusub wxaa loo qorshaynayaa jadwalka shirka dib-u-habeeynta si waxabarashada ardayga u sii-wado dugsiga lagu qoray ka dib marka oo soo dhameeystiro qaabka barnaamijka dib-u-habeeynta.

## Ardayda Dugsiga Hoose

Ardayda Dugsiga Hoose malagu sameeyn karo cayrinta dugsiga mudda-dheer. Saas darted, ma jiraano barnaamijka dib-u-diiwaangalinta ardayda dugsiga hoose.

---

[50] RCW 28A.600.022
[51] RCW 28A.600.022

Ardayda dugsiga hoose laga cayriyo waa in si dhaqsi ah dugsi kale hoose lagu qoraa si oo ardayda uga baaqan waxbarashada. Helitaan dugsiga waxay abuureeysaa qorshaha dib-u-habeeynta/dabiicada asluubta, waa in ardayga iyo waalidka joogaan si loo hubiyo habka ardayga waxbarashada ugu guulaysto.

## ANSIXINTA SHARCIYADA GUDIGA SARE DUGSIYADA

Gudiga Sare Dugsiga Seattle waxay waafaqayn sharciyada Juun 2015. Degmada Dugsiga Seattle wuxuu raacayaa qaynuunka iyo qaabka waafaqsan xuquuqda la kafaalo qaaday Gudiga Sare Waxbarashada Gobolka qodobka RCW 28A.600.010. *Fiiri,* WAC 392-400. Koobiga qaynuunka sharcigaan waxaa ka codsan kartaa adigoo la soo xariiraayo Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda 206-252-0820 ama waxaa kaloo ka buuxsan kartaa barta internet-ka [http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=392-400](http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=392-400).

## SHARCIYADDA DUGSIGA

Sharciga dugsiga kor ku qoran waxaa dheeraad ah, dugsi kastaba wuxuu hirgalinayaa ama qaybinayaa sharciga arday kastaba oo lagu fulinaayo akhlaaqda ardayga dugsiga u gaarka ah. Marka ardaygu jebiyo sharciga dugsiga waxaa lagu qaadayaa aadaabta dugsiga. *Fiiri,* **D-120 Sharci Jabinta** kore

## HABKA XAQ-SIINTA ARDAYDA

Dugsiga Dadweynaha Seattle waxay aamisan yihiin habka xaq-siinta ardayda in macnaheedu yahay in la daryeelo xaqa si cadaalad ah oo waafaqsan sharciga. Taas macnaheedu waxay tahay ardayga jebiyo sharciyada waa in lagu qaadaa sharciga aadaabta iyo sixitaan cadaalad fiican oo macquul ah. Ardayga wuxuu xaq u leeyahay in la dhegeysto dhiniciisa sida wax u dhaceen ka dibna lagu ciqaabaa dembiga uu geystey. Maamulka dugsiga wuxuu fulinayaan waxqabadka saxitaanka ka dib markuu baaro xaqiiqda iyo sida ay wax u dhacay, waxaaana waajib ah in la tixgeliyo sababaha iyo xaaladaha keenay sharci jabinta. Ardayga waxay xaq u leeyihiin in ay qaataan rafcaan haddii ay dareemayaan waxqabadka saxitaanka maamulka in uu yahay cadaalo-daro.

Dugsiga Dadweynaha Seattle wuxuu qaatay ama fulinayaa habka sharciga la sameyey WAC 180-40. Sharciga wuxuu qeexayaa qodobada iyo habka xuquuqda ardayda ka qaybgalaysa barnaamijka iyo waxqabadka mas'uulka ka yihiin Dugsiga dadweynaha Seattle. Intaa waxaa dheeri ah, Dugsiga Dadweynaha Seattle wuxuu qaatay habka hubinta iyo xeerarka difaaca. Ardayga wuxuu kaloo raaci karaa sharciyada dawlada kana mid ah WAC 392-400 (basaska dugsiga).

---

## CAYRINTA WAQTI-GAABAN[50]

Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga waxay dugsiga ka cayrinayaa waqti-gaaban ardayda jebiso sharciga Dugsiga Dadweynaha Seattle, aadaabta qeexayso *qodobada ka mamnuuc ah akhlaaqxumida*. Ka hor inta ardayga la cayrin waqti-gaaban, Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsig waa in ay raacaan sharciyada guud hoos ku qoran:

1. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga waa in ay gaaraan go'aanka ardayga lagu cayrinaayo iyadoo loo fiirinaayo xaaladaha iyo sababaha loo jebiyey sharciga. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga waa in ay aamisan yihiin ardayga in uu u qalmo lambarka maalmaha la cayriyey dugsiga waqti gaaban.

2. .Akhlaaq siinta ardayda waa in ay tahay cadaalad. Dugsiga Degmada waxay ku daabacaday shabakada Degmada heerka hogaaminta aadaabta dugsiyada goorta ardayga laga cayriyo waqti-gaaban. Heerka hogaaminta waxaa ka reeban xaaladaha soo socdo:

a. Marka Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga aamisan yihiin in ay jirto xaalado khafiifin ama ka reebitaan, ama

b. mar aan la isticmaalin Dembi galinta Degmadda horumarinta akhlaaqda.

3. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga waxay cayrin karaan waqti-gaaban ayagoo aan isticmaalin horumarinta akhlaaqda goorta ardayga sameeyo akhlaaqdaro reeban. Tusaale, ardayga hada dagaalo waxaa dugsiga laga cayrinayaa muddo gaaban dambiga koowaad iyadoo loo fiirinaayo horumarinta akhlaaqda maxaa yeelay Dugsiga Degmda Seattle waxay cidiqaasan tahay dagaalka in uu yahay akhlaaqdaro reeban.

4. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga ma cayrin karaan waqti gaaban ardayda Waxbarashada Dhalaanka ilaa Fasalka 4 in ka badan *toban (10) beri oo isku-xigta ama wadarta maalmaha dugsiga* xiliga hal simister ama saddex simistar leh, kuna xiran dugsiga.

5. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga ma cayrin karaan waqti gaaban ardayda fasalka shanaad ama ka sareeya in ka badan *shan iyo toban (15) simistar kastaba ama (10) beri oo isku-xigta ama wadarta maalmaha dugsiga* xiliga hal simister ama saddex simistar leh, kuna xiran dugsiga.

6. Ardayga laga cayriyo dugsiga muddo gaaban waxaa laga rabaa in uu ka soo shaqeeyo shaqada guriga iyo imtixaanada uu ka maqnaa, maxaa yeelay haddii cayrinta waqti gaaban tahay:

a. Shaqada guriga iyo imtixaanada waxay wax u dhibayaan ardayga dhibcihiisa.

b. Soo dhammeystir la'aanta shaqada guriga iyo imtixaanada micnahooda waxay tahay ardayga ma helaayo dhibcaha fasalka ama fasalo badan maadooyinkaas.

c. Ardayga ma lagu khasbi karo in uu luminta dhibcaha iyo heerka fasalka sababo cayrinta waqtiga-gaaban.

7. Ardayga kastoo laga cayriyo waqti gaaban wuxuu codsan karaa waxqabadka saxitaanka muddo yar, kana mid ah in loo oggolaado dugsiga ku soo laabto si dhaqso ah. Codsiga waxaa loo sameynayaa maamulaha dugsiga si hadal ah ama qoraal, iyadoo la tixgalinaayo Tilaabada 1aad ee cabashada.

8. Dhexdhexaadin: Hadii anshax marinta la dhexdhexaadiyey, ardayga iyo ama waalidka/wakiilka saxeexay heshiisku waxay qirayaan inay natiijada ku qanceen oo aanay racfaan kale qaadan doonin. Hadii dhexdhexaadinta aanay qolana ku qancin, cabashada waxaa loo wareejinayaa maamulka dugsiga oo go'aan ka gaadhi doona.

9. Eryidda gaaban waxay u bilaabanaysaa dhaqso iyadoon loo eegeyn in waalidka ama ardaygu rafcaanka qaateen.

Ogeysiiska Waalidka/Wakiilada iyo Ardayda Waqtiga-Gaaban la Cayriyey[51]

Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay in lala shiro ka hor cayrinta waqtiga-gaaban, goorta shirka, ardayga waa in uu bixiyaa hadal ama qoraal:

1 Fasiraada falka akhlaaqdaradda ama liiska tirada sharciyada dugsiga la jebiyey;

2 In muraajacad lagu sameeyo eedeynta lagu soo oogay;

[50] WAC 392-400-245 [51] WAC 392-400-250 Juun 2009 27

1 Fasiraad waxqabadka saxitaanka la sameynaayo; iyo,

2 Fursad oo ku fasiraayo dhinaciisa.

Inkastoo ardayga xaq u leeyahay shir ka hore inta aanan cayrin waqti-gaaban, ardayga waxaa la cayrin karaa waqti-gaaban iyadoo shir lala yeelan haddii uu diido in uu ka qaybqaato ama diyaar u noqon waayo shirka.

Waalidka/wakiilada waxay xaq u leeyihiin ogaysiis loo soo jeedinaayo waxqabadka akhlaaqdarada hadal ah ama qoraal luqada waalidka/wakiilada ku hadlaan. Ogaysiiska qoraalka waxaa lagu magacaabaa *Ogaysiiska Waxqabadka Akhlaaqda “Notice of Disciplinary Action* (NDA)”. Waxaana kuu diyaar ah turjubaan NDA. Waxaana ka mid ah NDA:

1 Sababaha cayrinta iyo muddada cayrinta
2 Xaaladaha la xariira cayrinta, sida waxqabad gaar ah looga baahan yahay dhameeystirka cayrinta (tusaale, shirka waalidka/wakiilada, mukhaadaraadka/khamriga, dhaqan-celinta dib-uhabeynta laga rabo, iwm.)
3 Xaq u yeelashada rafcaanka iyo sameynta habka rafcaanka.

Dhamaan cayrinta waqtiga-gaaban iyo sababaha cayrinta waa in lagu qoraa eSIS si uu diyaar ugu noqdo Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda “Discipline Appeals Office” 24 *saac gudahood* ka dib bilowga cayrinta.

Qaabka Cabashada (Rafcaanka): Cayrinta Waqti-Gaaban ama Waxqabadka Akhlaaq- darada kale[52]

Rafcaan ka qaadashada cayrinta waqtiga-gaaban waxaa lagu magacaabaa “cabashada.” Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay qaateen ayna fulinayaa qaabka xeerka summadiisu tahay WAC 180-40-240. Qaabka cabashada waxay fursad siinaysaa qaybaha kale rafcaan ka qaadayaasha in ay soo bandhigaan wax-yaalaha ay isku diidan yihiin maamulka dugsiga iyo cayrinta waqti-gaaban. Goorta cabashada dacwada, qaybta rafcaanka qaadatey waxay isku dayayaan in ay ku guulaystaan eedaynta akhlaaqdarada ubadkooda maamulka dugsiga ku soo oogay in ay aheyn mid cadaalad sax ah, waafaqsan sharciga ama ay wax qalad ka yihiin habka aadaabta.

Habka cabashada ma loogu talagelin xaaladaha la xariiro shaqaalaha dhaqan xun sameeyo. Haddii waalidka/wakiilada ay ku raacaan aadaabta ubadkooda lagu soo oogay in ku haboon tahay, laakiin habka maamulka dugsiga oo isticmaalay in ay ku habooneyn, dacwadda waxaa lala xariirayaa Agaasimaha Guud Waxabarashada ee Dugsiga. Ardayga, waalidka ama wakiilka waxay ka qaadan karaan rafcaan aadaabta ubadkooda. Waxaana jira saddex tilaabo heerka rafcaanka, waxaana lagu magacaabaa cabasho.

Tilaabada 1aad: Waalidka /ama wakiilada waxay xaq u leeyihiin codsasho in ay ka qaataan rafcaan aadaabta joojinta *shir aan caadi aheyn ee cabashada* maamulka dugsiga ama cida kale loo xil-saaray **labo maalin maalmaha shaqada gudahooda** si loo derso aadaabta. Maamulka dugsiga oo ka shaqanaayo aadaabta waa in loo sheegaa qaadashada rafcaanka.

Goorta shirka aan caadi aheyn, maamulaha dugsiga ama cida kale loo xilsaaro waxay su’aal weydiin karaan qofka rafcaanka qaadanaayo. Rafcaan qaadaha wuxuu su’aal weydiinayaa shaqaalaha dugsiga uu ka shaqaynaayo dhacdada keentay natiijada akhlaaqda. Maamulaha dugsiga ama cida kale loo xil-saaro waxay go’aansanayaan cayrinta akhlaaqdarada in ay sii jirayso

[52] WAC 392-400-240 Juun 2009 28

.

Tilaabada 2aad: Haddii qofka qaato rafcaan kuna qancin go'aanka tilaabada 1aad, waxay soo bandhigasaa *qoraal /ama hadal cabasho*[53] Dugsiyada Degmada Seattle Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda "Disciplinary Appeals Office". Cabasha la helaa ***labo maalin maalmaha shaqada gudahooda***. Agaasimaha Waxbarashada ama cida loo loo xilsaaray waxay dhageysaneeysaa dacwada rafcaanka tilaabada Labaad, ka dibna u diro rafcaanka qoraalka go'aanka oo gaaray.

Tilaabada 3aad: Haddii qofka qaato rafcaanka ku qancin go'aanka tilaabada 2aad, waxay soo bandhigaysaa *qoraal /ama hadal cabasho*[54] Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda "Disciplinary Appeals Council". Qoraalka caabasha waa in la helaa ***labo maalin maalmaha dugsiga ka dib marka aad heshid go'aanka tilaabada 2aad***. Codsiga qoraalka waxaa loo dirayaa Xafiiska Agaasimaha Guud, Mail Stop 32-150, PO Box 34165, Seattle, WA 98124-1165.

Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda waxay sameeynayaan inta badan jadwalka dacwada *Toban maalin maalmaha shaqada gudahooda* goorta ay helaan codsiga qoraalka *Toban maalin maalmaha shaqada gudahooda* ka dib dacwada.

Ardayga la siiyo cayrin waqti-gaaban waa in loo bilaabaa cayrinta si dhaqasi ah. Ka joojinta gaaban ee dugsiga way sii soconaysaa xataa hadii waalidka/wakiilku rafcaanka bilowdey, ilaa mooye maamulaha dugsiga ka tanaasulo qodobkaan. Maamulaha dugsiga wuxuu ikhtiyaar u leeyahay in uu sii wado ama joojiyo cayrinta rafcaanka go'aanka laga gaarin. Go'aanka ikhtiyaarka maamulaha dugsiga oo sameey qaybta rafcaanka maka qaadan karaan in ay sameeyaan rafcaan. Maamulaha dugsiga uma baahna in uu siiyo sababaha u diiday codsiga ka tanaasulid cayrinta waqti-gaaban sharciga[55] rafcaanka go'aanka laga gaarey.[5]

## KA CAYRINTA IYO KA SAARISTA DUGSIGA WAQTI-DHEER[56]

Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga waxay dugsiga ka cayrinayaa ama ka saarayaan waqti-dheer ardayda jebisa sharciga Dugsiga Dadweynaha Seattle aadaabta qeexayso qodobada ka mamnuuc ah akhlaaq-xumida. Ka hor inta ardayga la cayrin ama laga saarin waqti-dheer. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsig waa in ay raacaan sharciga guud ee hoos ku qoran:

1. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga waa in ay ku qanacsan yihiin sababaha ardayga looga cayriyey ama looga saaray dugsiga waqti-dheer in uu u qalmo. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga waa in ay u tixgaliyaan cayrinta ama saarista ardayga dugsiga waqtiga-dheer xaaladaha dembiga iyo daruufaha jira.
2. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga ardayga kama cayrin karaan mana ka saari karaan waqti-dheer ilaa mooyee ay ka isticmaalaan horumarinta akhlaaqda ama gelida dembiga noociisa yahay mid ka reeban akhlaaqda xumi.
3. Dhexdhexaadinta: Hadii go'aanka edbinta lagu gaadhay dhexdhexaadin, ardayga iyo waalidka/wakiilku way ku qanacsan yihiin in go'aanku dhexdhexaadintu[104] yahay kama danbayn oo aanay racfaan ka qaadan karin. Hadii dhexdhexaadinta aan laysku raacin, cayrinta dheer waxaa loo marayaa dariiqan.
4. Cayrinta dheer ama cayrinta rasmiga ahi waxay bilaabmaysaa (4) cisho ka bacdi wakhtiga

[5] WAC 392-400-255.

dhacdadu dhacday, si waalidka/wakiilka loo siiyo wakhti ay racfaan kaga qaadan karaan go'aanka cayrinta. Tani ma khusayso cayrinta xaalada degdega ah, oo bilaabanta maalinta dhacdada gaadhina karta ilaa (10) cisho. Cayriska degdega ah waxaa la sameeyaa kaliya marka la rumaysan yahay in aanu ardaygu, ama ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga amaan koodu sugnayn, ama habka waxbarashadu aanu si habsamiya u socon karayn.

5. Cayrinta dheeri waxay noqon kartaa 11 maalmood ama ilaa inta simistarku dhamaanayo. Ardaygu wuxuu kusoo noqondoonaa dugsiga laga cayriyey markuu wakhtigu ka dhamaado.

6. Cayrinta dugsi gaara laga cayriyaa waa rasmi ardayguna kuma soo noqon karo dugsigaa. Hase yeeshee waxaa magaalada Seattle ka jira dugsiyo iyo barnaamijyo kale oo lagu qori karo ardayga dugsi gaara laga soo cayriyo. Marka laga reebo hadii Dugsiyada Degmada looga cayriyo arin hub la xiriirta[105]. Wakhtiga uu ardayga la cayriyaa dugsi la'aan ahaan karaa waa (10) maalmood[106].

53 Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay ogolaanayaan qoraalka ama hadal ku codsiga Tilaabada 2 cabashada

54 Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay ogolaanayaan qoraalka ama hadal ku codsiga Tilaabada 2 cabashada.

55 WAC 392-400-255.

56 WAC 392-400-260.

Juun 2009 29

3. Akhlaaq siinta ardayda waa in ay tahay cadaalad. Dugsiga Degmada waxay ku daabacday heerka hogaaminta aadaabta dugsiyada, xilliga ardayga laga cayriyo waqti-dheer. Waa in habeyn loo sameeyaa xaaladaha soo socdo:

a. Goorta Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga aamisan yihiin in ay jirto xaalado khafiifin ama ka reebitaan, ama
b. Goor aan la isticmaalin Dembi gelinta Degmadda horumarinta akhlaaqda.

4. Gudiga Sare Dugsiga Seattle waxay si toos ah u quseysaa in ardayga dugsiga looga cayrin ama looga saari karin maqnaasho awgeed.
5. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga ma cayri karaan waqti-dheer ardayda Waxbarashada Dhalaanka ilaa Fasalka afaraad, laakiin waxay dugsiga ka saari karaan ardayda Waxbarashada Dhalaanka ilaa Fasalka afaraad.
6. Maamulaha iyo kaaliyaha maamulaha dugsiga wuu cayri karaan waqti-dheer ardayda Fasalka shanaad iyo ka sareeyo, laakiin ardaydaas ma luminaayaan dhibcaha cilmiga ama fasalka natiijada ka timid cayrinta ama ka saarista dugsiga ardayga hal jeer
7. Ardayda iyo waalidka waa in la ogaysiiyaa xuquuqda ay u leeyihiin inay waxbaashada ku sii wataan barnaamijka dib u soo noqoshada iyo siday loo helo.
8. Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay sida ku xusan xeerka RCW 28A.600.022, in loo qabto kulan lagula xaajoonayo, waana in loo qabtaa 20 cisho gudahood marka wakhti dheer la cayriyo. Sida ugu wanaagsan ee arintan loo maareeyaa waa in taariikhda kulanka wada xaajoodka lagu qoro warqada Ogaysiiska Go'aanka Cayrinta.

Ka Reebinta Sharciga Horumarinta Akhlaaqda

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay dugsiga ka saarayaan ardayga galo dembiga koowaad iyadoo aan la tixgelin horumarinta akhlaaqda goorta la ogaado sababo fiican oo la garaysan yahay in nooca qaabkaan waxqabad lagu sixi karin haddii shaqaalaha isku dayaan lagu guulaysan karin. Waxaana si gaar ah ugu mid ah dembiyada halista ah sida mukhaadaraadka iyo khamriga, aflagaadada, handadaada, rabshadaha, iyo hubka khatarta ah. Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay xaq u leedahay in ay ka saaraan ardayga dugsiga dembi ka galo marka la aamisan yahay in waxqabad yar lagu sixi karin bedelaad dabiicada ardayga lagu bedelo.

Ogaysiiska Waalidka/Wakiilada Cayrinta ama Ka Saarida Waqti-dheer [57]

Ka hor inta ardayga laga cayrin ama laga saarin dugsiga, ardayga iyo waalidka ama wakiilka waa in ay helaan qoraalka Ogaysiiska Waxqabadka Akhlaaqda kana mid ah akhbaaraha ku saabsan xaqa rafcaanka cayrinta iyo ka saarista waqti-dheer iyo fursadaha dacwada. Ogaysiiska waa in loogu geeyaa shaqsi ahaan ama warqada cadeynta boostada. Ogeysiiska waa in uu yahay:

1. Waa in ku qoran yahay Luqada 1aad waalidka/wakiilada haddii la sameyn karo;
2. Fasiraayo dembiga lagu soo oogey iyo sharciyada dugsiga degmada lagu soo eedeeyey in la jebiyey,
3. Cadeynta waxqabadka lagu saxaayo ama aadaabta qorshaha talo siinta,
4. Fasiraada xuquuqda ardayga /ama waalidka ama wakiilada ee dacwada iyo ka qaadashada rafcaanka dambiga lagu soo oogey una sheegtaan sida habka rafcaanka.
5. Fasiraada waqtiga la xadiday in la helo codsashada dacwada

Ka dib waalidka/wakiilada helaan ogaysiiska go'aanka cayrinta ama ka saarida waqti-dheer

Ka dib waalidka/wakiilada marka ay helaan go'aanka ubadkooda ee cayrinta ama ka saarista dugsiga waqti-dheer. go'aanka koowaad, miyuu ka qaadanayaa rafcaanka cayrinta ama ka saarista dugsiga waqti-dheer?. Go'aanka rafcaan qaadashada waa in laga gaaraa si dhaqsi ah saddex maalin gudahooda, waxayna ka bilaabanaysaa maalinta ubadka dugsiga laga cayriyo ama laga saaro waqtidheer.

Waalidka/wakiilada go'aansado in ay qaataano rafcaanka waa in ay aadaan Xarunta Diiwaangelinta si loogu diyaariyo barnaamijka waxbarashada ku haboon. Ku qoritaanka waxbarashada caadiga ah waa Barnaamijka Dib-u-galinta (Reentry Program) inta ka hartay simistarka, laakiin xaaladaha qaarkood kuma haboona ardayga inta badan, gaar ahaan ardayga laga cayriyo ama laga saaro dugsiga waqti-dheer in ka yar 30 maalin. Cayrinta dugsiga waqti-dheer oo yar ardayga wuxuu awood u

[57] WAC 392-400-265 iyo WAC 392-400-270.



leeyahay in uu shaqada guriga dugsiga loogu soo diro guriga, mana u baahna in lagu qoro barnaamijka waxbarasha kale. Cayrinta ama ka saarista dugsiga waqti-dheer in ka badan 30 maalin ardayga waa in uu

raadiyaa in lagu qoro barnaamijka waxbarashada kale. Ka saarida ardayga dugsiga si dhaqso ah waa in uu aadaa Xarunta Diiwaangelinta, maxaa yeelay ma ku soo laabanaayo dugsiga uu dhigan jiray.

Haddii ardayga dugsiga laga cayriyo ama looga saaro waqti-dheer dembiga la xariiro rabsho xoogmuquunis ah, ardayga waxaa looga baahan yahay in uu ka qaybgalo ama soo buuxiyo barnaamijka degmada oggolaatay ee sida loo maamula xanaaqa/barnaamijka xalinta dhibaatooyinka ka hor inta oo dugsiga caadiga ah ugu soo laaban. Fadlan kala falanqood Xarunta Diiwaangalinta ama Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda taleefoonka (206) 252-0820.

Marka ardayga soo dhameeystiro cayrinta waqtiga-dheer, waa in uu keenaa cadeynta waraaqadaha barnaamijka soo dhameeyey oo ku saabsan waxqabadka akhlaaqda. Si toos ah ardayga waxaa dib loogu qorayaa dugsiga. Ardayga dib ma loogu qoraayo dugsiga uu horay u dhigan jiray oo laga cayriyey ama laga saaray waqti-dheer. Waxaa ardayga laga diiwaangalinayaa dugsi kale.

Sharciga gaarka ah ee dib ugu qorida ardayga dugsigiisii horay u dhiganaayey laga saaray

Sida caadiga ah, mincaha ka saarida dugsiga waxay tahay ardayga dugsiga laga cayriyey dib ma ugu soo laabanaayo. Hase ahaatee, waalidka/wakiilada waxay qoran karaan codsi ardayga in dib loogu qoro dugsiga horay u dhigan jiray. Codsiga qoraalka waa in loo diraa maamulaha dugsiga ardayga la cayriyey. Ardayga ama waalidka/wakiilada waa in ay ku cadeeyaan codsigooda sababaha dib loogu diiwaangalinaayo. Go’aanka ka gaarida dib u diiwaangalinta ardayga dugsiga laga saaray waa mid ikhtiyaar u ah maamulaha dugsiga. Go’aanka maamulaha dugsiga uu gaaro rafcaan malaga qaadan karo.

Qaabka Rafcaanka

Goorta ardayga laga cayriyo ama laga saaro dugsiga waalidka/wakiilada waxay ka qaadan karaan rafcaan cayrinta ama saarida Agaasimaha Guud. Dugsiyada Dadweynaha Seattle, Agaasimaha Guud wuxuu u xil-saaray dacwada maamulayaasha in ay dhegeystaan rafcaanka uu u xil-saaray Agaasimaha Guud. Maamulayaasha dacwada waxay xubin ka yihiin ururada, loona tababaray sharciyada gobolka iyo siyaasada dugsiga degmada iyo fahansan qudobada sharciga qaynuunka. Maamulayaasha dacwada waxay sameyn karaa in ay raacaan ama diidaan go’aanka ama dib u habeyn ku sameeyaan akhlaaqda, cayrinta ama ka saarida ardayga dugsiga. Qaabkaan soo socdo ayaa loo isticmaalayaa:

## A. Waqti la Xadiday

1 Qaybta rafcaan qaadashada waa in ay ka codsadaan dacwada Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqada *saddex (3)* beri gudahood maalmaha dugsiga ka dib goorta ay helaan ogaysiiska saxitaanka waxqabadka ama qorshaha talo bixinta akhlaaqda. Codsiga rafcaanka wuxuu noqon karaa qoraal ama oraah, kana mid ah wicida taleefoonka Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqada 206-2520820.

2 Waalidka/wakiilada codsado rafcaan aan la helin *saddex (3)* beri gudahood maalmaha dugsiga ka dib goorta ay helaan ogaysiiska saxitaanka waxqabadka ama qorshaha talo bixinta akhlaaqda, maamulaha dugsiga wuxuu ku soo oogayaa cayrinta ama ka saarista ardayga dugsiga waqti-dheer, waalidka/wakiilada malaha fursad ay ku codsadaan rafcaan.

3 Haddii waalidka/wakiilada codsado rafcaan lana helo *saddex (3)* beri gudahood waqtiga la xadiday ee Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqada waxay sameeynayaan jadwalka dacwada *saddex*

*(3) bari gudahood maalmaha shaqada* maalinta rafcaanka la helay.

Juun 2009 31

## B. Xuquuqda waalidka/wakiilada iyo ardayga

Waalidka/wakiilada waxay leeyihiin xuquuq marka uu socdo qaabka rafcaanka ka hor ama ka dib codsiga dacwada. Xuquuqdooda waxaa ogolaadey sharciga ku qoran WAC 392-400. Xuquuqda waalidka/wakiilada waxaa ka mid ah laakiin la xadidin qodobada soo socdo:

1 Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay baaraan ka hor dacwada dhamaan qoraalka ama ashyaada cadeynaya uu maamulku dugsiga soo bandhigay dacwada, kana mid ah marqaatiga. Magaca ardayga waa la qarinayaa.
2 Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay wakiishaan qareen gaar ah, dadweynaha aheyn, qarash ah. Qareen muhiim ma'aha in uu gaaro xal loo siman yahay go'aanka dacwada, maxaa yeelay tababarka maamulayaasha dacwada. Dugsiga Dadweynaha Seattle waxay keensanayaan qareenkooda haddii rafcaan qaadayaasha la yimaadaan qareen. Sidaas darteed, waalidka/wakiilada waa in ay u soo sheegaan Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda sida ugu dhaqsiyaha leh haddii ay wakiilanayaan qareen.

1 Rafcaan qaadayaasha waxay ka codsan karaan maamulaha dugsiga in u diyaariyo markhaatiga arkay ama dadka aqoonta u leh dhacdada si ay u weydiiyaan su'aalado goorta dacwada, kana mid ah ardayda kale.
2 Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyahay weydiin su'aal iyo weji-weji isaga hor-imaad markhaatiga dacwada. Xuquuqda way xadidan tahay goorta Dugsiga Dadweynaha Seattle ay sameeyaan sababo suurta gal ah in ay keenaan markhaatiga, maamulka dugsiga awood uma laha arday keenida iyadoo maamulka dugsiga ka baqaayo in la sameeyo aar-gudasho haddii ardaygu marqaati noqdo.
3 Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay qeexaan ama fasiraan eedaynta sida xun loogu dhaqmay.

6. Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay soo bandhigaano dhamaan qoraalada iyo ashyaada cadeynaaya kana cawinaaya dacwada ardayga.

## C. Xuquuqda maamulka dugsiga dacwada ka hor

Maamulka dugsiga ama ciddii kale oo wakiisho dacwada ardayga. Wuxuu xaq u leeyahay horay dacwada in oo u baaro dhamaan qoraalada ama ashyaada caddeynaaya maragkaca oo waalidka ama wakiilada ay soo bandhigaan dacwada.

## D. Dacwada

1 Ka qaybgalayaasha dacwada waa in la xadidaa, waxaana loo oggol yahay keliya dadka ay quseyso dacwada gacantana ku haya, waxaana go'aaminaayo maamulaha dacwada.
2 Hadii maamulka dugsiga, ardayga iyo waalidka/wakiilku isku raacaan anshaxa la marinayo ardayga, waa inay saxeexaan heshiiska dhexdhexaadinta[109], oo lagu cadaynayo dhamaan wixii isbedela ee la samaynayo. Ardayga iyo waalidka/wakiilku waa inay saxeexaan in heshiiska dhexdhexaadintu yahay go'aan kama danbaysa oo aan ardayga iyo waalidka/wakiilku racfaan ka qaadan karin. Hadii labada qolo mid go'aansado inaan arinta dhexdhexaadin laga gali karin, dacwadu horay usii soconaysaa.
3 Cadeynta la soo bandhigo dacwada ardayga waxaa loo isticmaalayaa keliyah go'aan gaarida dembiga ama aan laheyn dembi. Sarkaalka dacwada ma la siin karo akhbaaro ka banaanka ah dacwada.
4 Cida dacwada dhegeysaneyso waa in ay tahay qof dhex-dhexaad ah. Qofkaas ma noqon karo markhaati dacwada keena natiijada akhlaaqdarada ama cadeynta dacwada.

5 Dacwada waxaa lagu duubayaa cajalad.

6 Sarkaalka dacwada wuxuu sameeynayaa qoraal go'aanka ah ee dacwada. Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda waxaa loo dirayaa qoraalka go'aanka ardayga ama waalidka/wakiilada muddo qiyaas ah todobaad gudahood.

## KA SAARIDA DEG-DEGA AH AMA U CAYRINTA NABADGALYADA

### Ka saarista deg-dega ah fasalka, maadada ama waxqabadka[110]

Shaqaalaha dugsiga waxay ardayga si dhaqso ah ugu saarayaan fasalka, maadada ama waxqabadka, una diraayaan maamulka dugsiga ama cidi kale oo ka mas'uul ah, iyagoo sheegaya sababo lagu qanco oo la aamisan yahay in ardayga joogitaankiisa ay keeni karto khatar ardayga, ardayda kale, shaqaalaha dugsiga ama in uu sii wadaayo handadaada keeni karto joojinta fasalka, maadada ama waxqabadka ama habka waxbarashada ardayda dugsiga. Arimahaan waxay la xariirtaa habka maamulka sida loo hubin lahaa nabadgelyada ardayga, shaqaalaha iyo cimilada deegaanka dugsiga. Mararka qaarkood, ugu mamnuucida ardayga dugsiga sameynta akhlaaqdaro oo raacsan ka saarida deg-dega ah iyo u cayrinta nabadgalyada. Ka saarida ardayga way sii soconaysaa ilaa ay caddaanayso: (a) khatarta ama handadaada aysan jirin oo dhamaatay (b) maamulka dugsiga ama cidi kale oo ka mas'uul ah waxay amar ku bixinayaan ficilka waxqabadka ku haboon. Cayrinta degdega ah wuxuu ardaygu ku dhamaysan karaa wakhti uu ku jiro ciqaab kale loogu xukumay.

### Ka saarida deg-dega ah[111]

Maamulka dugsigu wuxuu ardayga dugsiga uga cayrin karaa si degdega, hadii laysku raaco in joogitaanka ardaydu ay dugsiga, ardayda iyo waxbarashada galinayso khalkhal iyo khatar. Cayrinta degdega ahi kama badnaan karto 10 cisho. Wakhtiga cayrista waa inuu ardaygu dhamaystaa, tiiyo maamulka ama dacwada racfaanku wax ka badelaan mooyaane.

Maamulka dugsiga ama cidi kale oo ka mas'uul ah waxay la shirayaan ardayga dugsiga laga saaray muddo aan ka badneyn maalinta xigta iyadoo la bilaawaayo ficilka ku saxitaanka ku haboon oo ku saabsan ka saarida ardayga. Qofka shaqaalaha ka wakiil ah, kana saaray dugsiga waxaa la ogaysiinayaa ficilka waxqabadka lagu saxaayo ee la qaaday ka hor inta u soo laaban aradyga fasalka ama ciyaaraha.

### Uga Saarida Nabadgalyada (Ka saarida Deg-dega ah)

Maamulka Dugsiga wuxuu ardayga si dhaqso ah ugu saarayaa dugsiga sababo nabadgalyo dartood, iyadoo sheegayaan sababaha lagu qanco oo la aamisan yahay in ubadka joogitaankiisa ay keeni karto khatar isaga iyo dadka kale. Ka saarida way sii soconaysaa ilaa maamulka oggolaado ama ilaa laga sameeyo qorshe nabadgalyo u leh goobta ardayga ku soo laaban karo uuna maamulay maamulka dugsiga ama degmadda ardayga.

### Xadidaada Ka saarida Deg-dega ama ka saarida nabadgalyada[59]

Maamulka Dugsiga wuxuu ardayga si dhaqso ah ugu saarayaan dugsiga iyagoo sheegaya sababo lagu

qanco oo la aamisan yahay in ardayga joogitaankiisa ay keeni karto khatar rabshado fasalka, waxqabadka iyo waxqabadka dhacdooyinka la xariira dugsiga. Ka saarida deg-dega way sii soconaysaa ilaa maamulka ogolaado ama ilaa laga sameeyo qorshaha dib u habeyn rafcaanka dacwada.

## Ogaysiiska Waalidka/Wakiilada Ka Saarida Deg-dega ama ka Saarida Nabadgalyada[112]

Waalidaka/wakiilada waxaa la ogaysiinayaa ka saarida deg-dega ama ka saarida nabadgalyada iyo xuquuqda rafcaanka. Guud ahaan, waxaa loo dirayaa warqada dacwada isla markaana waxaa lagu dadaalayaa in lagu ogaysiiyo rafcaanka dacwada qaybaha kale wicitaan taleefoon ama la xariirin shaqsiyaad ah oo si dhaqso ah. Hoos waxaa ku qoran sharciyada guud ogaysiiska qaybaha rafcaanka dacwada ka saarida deg-dega ama ka saarida nabadgalyada. Ogaysiiska wuxuu noqon karaa qoraal ama oraah:

1. Maamulka dugsiga wuxuu hubinayaa qoraalka dacwada in gacan loogu geeyo muddo 24 saac gudahooda ka dib xilliga ka saarida deg-dega ama ka saarida nabadgalyada ama

2. Maamulka dugsiga waxay u dirayaan waraaqada dacwada qaybaha dacwada rafcaanka muddo 24 saac gudahooda, ka dib goorta ka saarida deg-dega,

3. Qoraalka ogaysiiska waa in uu ku qoran yahay luqadda waalidka/wakiilada ardayga ku hadlaano ama ay fahmayaan haddii la helaayo,

4. Ogaysiiska qoraalka iyo oraahda waa in uu fasiraa eedeynta akhlaaqdarada iyo jebinta sharciyada dugsiga degmada lagu soo oogay eedeyntooda.
5. Ogaysiiska qoraalka iyo oraahda waa lagu cadeeyaa qorshaha waxqabadka saxitaanka,
6. Ogaysiiska qoraalka iyo oraahda waa in lagu fasiraa xuquuqda ardayga iyo waalidka ama wakiilada ee eedeynta dacwada rafcaanka.

7. Ogaysiiska qoraalka iyo ficil waa in loogu fasiraa sida rafcaanka looga qaadanaayo eedaynta iyo waqtiga xadidan looga baahan yahay codsiga dacwada in ay sameeyaan.

## Habka rafcaanka ay ka saarida deg-dega ama u cayrinta nabadgalyada

Haddii ka saarida deg-dega ah ay tahay kaliyaha ogaysiis qoraal warqad ah, ardayga ama waalidka ama wakiilada ay codsadaan dacwada rafcaanka ilaa *tobon (10) maalin maalmaha shaqada* ka dib xilliga uu helo ogeysiiska ka saarida deg-dega dugsiga ee Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda. *Xiliga tobanka beri rafcaanka codsashada* waxay khuseysaa oo keliyah goorta ka saarida deg-dega ama u cayrinta nabadgalyada uu yahay ficil waxqabad lagu soo oogey. Muddada u dhexeysa joojin (ka saarida ama cayrinta waqti-dheer), caadi ahaan, waxaa la codsanaya saddexda beri rafcaanka, iyadooo la raacaayo siyaasada Dugsiga Degmada Seattle, codsiga rafcaanka wuxuu noqon karaa mid qoraal ah ama soo wicid taleefoonka ah.

Haddii codsiga rafcaanka aan la helin *tobon maalin maalmaha dugsiga* gudahooda goorta la helo ogaysiiska ka saarida deg-dega dugsiga, ka saarida dugsiga deg-dega ama u cayrinta nabadgalyada way sii soconayaan, ardayga, waalidka iyo wakiilada ma helayaan fursad ay ku qaataan rafcaanka dacwada.

Marka la helo codsiga rafcaanka dacwada waqtiga loo baahan yahay oo la xadiday, dugsiga degmada waxay sameeynayaan jadwalka una dirayaan ogaysiiska dacwada goorta la qabanaayo muddo aan ka badneyn *saddex maalmaha shaqadda* goorta la codsado ka dib.

## A. Xuquuqda waalidka/wakiilada iyo ardayga

Waalidka/wakiilada waxay leeyihiin xuquuq marka uu socdo qaabka rafcaanka ka hor ama ka dib codsiga dacwada. Xuquuqdooda waxaa oggolaaday sharciga ku qoran WAC 392-400. Xuquuqda waalidka ama wakiilada waxaa ka mid ah laakiin la xadidin qodobada soo socdo:

1. Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay baaraan ka hor dacwada dhamaan qoraalka ama ashyaada cadeeynaayo uu maamulka dugsiga soo bandhigay dacwada, kana mid ah markhaatiga. Magaca ardayga waa la qarinayaa. Wakhtiga oo kooban dartii, qoraalada loo gudbinayo dacwada racfaanka waxaa laga yaabaa inay diyaar noqdaan 24 saacadood ka hor dacwada.
2. Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay wakiishaan qareen gaar ah, dadweynaha aheyn, ay kharashka la baxayaan. Qareen muhiim ma'aha in uu xalin loo siman yahay go'aanka dacwada maxaa yeelay tababarka maamulayaasha dacwada. Dugsiga Dadweynaha Seattle waxay keensanayaan qareenkooda haddii rafcaan qaadayaasha la yimaadaan qareen. Sidaas darteed, waalidka/wakiilada waa in ay u soo sheegaan Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqada sida ugu dhaqsiyaha leh haddii ay wakiilanayaan qareen. Xaqa uu ardaygu u leeyahay in sadex maalmood gudahood dacwadiisa lagu dhagayso, waxaa laga yaabaa inay dib u dhacdo hadii kooxda kale racfaan dalbato.
3. Rafcaan qaadayaasha waxay ka codsan karaan maamulaha dugsiga in u diyaariyaan markhaati arkay ama dadka aqoonta u leh dhacdada si ay u weydiiyaan su'aalado goorta dacwada, kana mid ah ardayda kale.
4. Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin weydiin su'aal oy fool ka fool isaga horyimaadaan markhaatiga dacwada. Xuquuqda way xadidan hadii markhaatiyada la dalbaday ay arday yihiin iyo Dugsiga Dadweynaha Seattle ay sameeyaan sababo suurta gal ah in ay keenan ardayda markhaatiga ah, maamulka dugsiga awood uma laha arday keenid iyadoo maamulka dugsiga ka baqaayo in la sameeyo aar-gudasho haddii ardayga markhaati noqdo.
5. Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay qeexaano ama fasiraano eedaynta sida xun loogu dhaqmay.
6. Rafcaan qaadayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay soo bandhigaan dhamaan qoraalada iyo ashyaada cadeynaayo kana cawinaayo dacwada ardayga.
7. Waa inaan labada dhinac midna ka cadhaysiin, kadeedin, wax u dhimin ama uhanjabin qofka markhaatiga furaya. Sarkaalka dacwadu kuxuu xaq u leeyahay inuu ka joojiyo su'aalaha hadii aanu mudicigu markhaatiga xishmayn.

## B. Xuquuqda maamulka dugsiga dacwada ka hor

Maamulka dugsiga ama cidii kale uu wakiisho dacwada ardayga. Wuxuu xaq u leeyahay horay dacwada in uu u baaro dhamaan qoraalada ama ashyaada cadeeynaayo marakaca oo waalidka ama wakiilada ay soo bandhigaan dacwada. Ardayga iyi waalidka/wakiilku waa inay maamulka usoo gudbiyaan nuqulka wixii qoraalo ah ee ay sarkaalka dacwada qaadaya u gudbinayaan.

## C. Sharciyadda Guud ee Dacwada

Akhbaarahaan soo socdo waxay caawinayaan waalidka/wakiilada qorshaynaaya qaadashada dacwadda iyo akhbaargelinta ku saabsan sharciyadda dacwadda:

1. Ka qaybgalayaasha dacwada waa in la xadidaa, waxaana loo oggol yahay kaliyah dadka ay

quseyso dacwada gacantana ku haya inta badan maamulka dugsiga, ardayga iyo waalidka ama wakiilka iyo marag arkeysey dhacdada. Haddii ardayga uu ka wakiil yahay qareen, Qareen Degmada waa in uu jooga oo laga talo qaataa maamulka dugsiga. Xubnaha qoysaska kale ama asxaabta malaga sugaayo in ay ka qaybgalaan, waalidku wuxuu haq u leeyahay inuu qof kale oo caawiyaa kala soo qaybgalo, waase inaanu qofkaasi ahayn markhaati. Sarkaalka dacwada ayaa go'aanka ugu dambeeyo ka gaaraayo dadka goob jooga ah.

2. Waxaa la keenayaa warqad ay dhamaan dadka dacwada kasoo qaybgalayaa magacooda ku qorayaan.
3. Dhamaan dadka dacwada kasoo qaybgalaa waa inay ixtiraamaan dadka kale. Qaylo, cay, habaar, qasid markhaati, ama hanjabaad kale, waxay sababi kaan in sarkaalka dacwada qaadayaa dacwada si degdega u joojiyo. Tiiyoo la fiirinayo sababta dacwada loo joojiyey sarkaalka dacwada qaadayaa wuxuu taariikhayn karaa maalinta kale ee dacwada la qaadayo ama wuxuu go'aankiisa ku salayn karaa wixii warbixina ee uu helay intaanu dacwada joojinin.
4. Markhaatiyada waxaa laga yaabaa inaan loo ogolaan inay soo galaan qolka dacwada lagu qaadayo, marka loo baahdo inay markhaatiga furan mooyaane. Markay markhaatiga furaana waxaa laga yaabaa in laga codsado inay qolka ka baxaan.
5. Cadeynta la soo bandhigo dacwada ardayga waxaa keliyah ayaa loo soo gubinayaa sarkaalka dacwada qaadaya si uu go'aan gaarida dembiga ama aan laheyn dembi ugu saleeyo. Sarkaalka dacwada ma la siin karo warar ka baxsan dacwada.
6. Sarkaalka dacwada ayaa go'aanka sameeynaaya iyadoo saldhig u ah qaabka qodobada soo socdo:
   - A. Cadeynta kan qaabil ah: Miyuu dhacay dabiicada lagu soo oogay?
   - B. Heerka akhlaaqda Degmada: Miyuu dugsiga xaq u leeyahay doorashada dabiicada akhlaaqda ardayga, iyadoo sal-dhig looga dhigaayo heerka akhlaaqda oo ka-reeban yahay Aadaab-xumida ama heerka akhlaaqda Dembiyada Degmada iyo Sharciyada dugsiga?
   - C. Xaaladaha Qafiifinta: Miyuu aqoonsan yahay xaaladaha khafiifinta maamulka Degmada si loo tixgeliyo waxqabadka tillaabaha dugsigu go'aasaday aadaabta dabiicada asluubta loogu doortay in wax loogu qabto ficil asluub xumida?
7. Sarkaalka dacwada dhegeysanayaa waa qof dhex-dhexaad ah. Qofkaas ma noqon karo markhaati dacwada keena natiijada akhlaaqdarada ama cadeynta dacwada.
8. Dacwada waxaa lagu duubayaa cajalad.
9. Sargaalka dacwada wuxuu sameeynayaa qoraal go'aanka ah ee dacwada. Xafiiska Rafcaanka Akhlaaqda waxaa loo dirayaa qoraalka go'aanka waalidka waxaa boostada loogu dirayaa warqada dacwada rasmiga muddo qiyaas ah todobaad gudahood. Waalidka waxaa loo diyaarinayaa turjumaano haddii ay qoyska codsadaan, waxaana qarashka bixinaayo degmada.
10. Xilligaa ka saarida deg-dega dugsiga ama u cayrinta nabadgalyada ay tahay oo keliyah waxqabad, go'aanka waxaa la siinayaa *hal bari oo maalmaha shaqadda* ka dib dacwada ardayga ama waalidka/wakiilada waa la soo ogaysiinayaa warqada boostada gaarka ee U.S. ah hal todobaad gudahooda.

## D. Dhererka Cayrinta Degdega ah

Cayrinta degdega ah ee ardaygu waa inay dhamaataa ama lagu badalaa ciqaab kale oo agu saxayo dhaqan xumada toban maalmood gudahood taariikhda dugsiga la cayriyey.

Ardayga laga saaro si deg-dega ah way sii soconayaa ka dib dacwada haddii ay jirto weli xaalad ka saarida deg-dega. Ka saarid deg-dega ah way sii soconayaa ka dib dacwada haddii qayb ka mid ah saxitaanka waxqabadka, sida cayrinta ama ka saarida waqti-dheer, ama haddii ay jirto ficil dacwo socoto aan la go'aamin.

Cayrinta nabadgalyada way sii soconaysaa iyadoo ay qiimaynaayaan khatarta Xafiiska Ilaalinta iyo Nabadgalyada iyo qorshaha nabadgalyada ardayga ugu soo laaban lahaan goobta dugsigiisa.

---

## RAFCAANKA GUDIGA SARE DUGSIYADA[113]

Waalidka/wakiilada waxay xaq u leeyihiin fursad labaad rafcaanka ku qaataan dacwada haddii Sarkaalka xafiiska dacwada ayna ku raacin go'aankiisa dugsiga ee ficilka saxitaanka waxqabadka cayrinta, ka saarida, ama cayrinta deg-dega ah, ugu cayrinta nabadgalyo awgeed. Gudiga Sare Dugsiyadda Seattle waxay leeyihiin ergo awood la siiyey oo dhegeysanaayo dacwada ka dibna go'aan gaaraaya cayrinta waqtiga-dheer iyo rafcaanka ka saarida gudiga rafcaanka akhlaaqda "Disciplinary Appeals Council[114]". DAC waxaa soo magacaabo Gudiga Sare Dugsiyadda, waxayna ka kooban yihiin ugu yaraan saddex qof, waxayna shaqaynayaan waqti xadidan.

Qaybta qaadanayso rafcaanka waa in ay u diraan *qoraalka warqada ogaysiiska* Xafiiska Agaasimaha Guud saddex *(3) beri oo maalmaha shaqada dugsiga* ka dib xilliga uu helo goa'aanka dacwada ee xafiiska dacwada. Warqada waxaa loo diraa Xafiiska Agaasimaha Guud Ciwaankaiisu yahay: Mail Stop 32-150, P.O. Box 34165, Seattle, WA 98124-1165.

Waxaa muhiima in la fahmo in Guddida Racfaanka Edbintu ay fiirinayaan dhamaan doodaha dacwadu ku salaysan tahay (sida; go'aanka sarkaalka dacwada qaaday). Guddida Racfaanka Edbintu ma dhagaystaan dacwad cusub. Sidaa darteed, hadalka markhaatiga way dhagaysan karaan haday rabaan.

Haddii qaybta qaadanayso rafcaanka aysan rafcaan ka qaadan go'aanka Xafiiska Sarkaalka Dacwada cayrinta waqti-dheer ama ka saarida oo lagu soo oogey maalmaha taariikhda ay dhacayso xiliga saddexda beri oo la xadiday.

Qaybaha qaadanaaya rafcaanka waa in saddex *beri oo maalmaha shaqada dugsiga gudahood* rafcaanka ku qaataan. Hase ahaatee, ardayga la cayriyo ama laga saaro dugsiga waqti-dheer, waxaa lagu soo ooggi karaa mudda rafcaanka xaaladaha soo socdo:

1 Ka saarida deg-dega ah ama u cayrinta nabadgelyada wuxuu ku haboon yahay goorta go'aan laga qaato rafcaanka ma ka badnaan karto *toban beri oo isku xigto maalmaha dugsiga* ama ilaa laga gaaro go'aanka rafcaanka, hadba muddo ko yar;

2 Ka saarida deg-dega ah ama u cayrinta nabadgelyada way sii soconaysaa xiliga rafcaanka haddii ay jirto in arday sii wadaaya khatarta handadaada iyo waxyeelaynta nafsadiisa ama dadka kale ama in uu wax u dhibaayo ama joojin ku sameeynaayo habka waxbarashada ardayda dugsiga;

3 Maalmo kastoo ardayga dugsiga laga cayriyo ama laga saaro muddo gaaban ku sii meel gaar ah ka hor inta rafcaanka la go'aansan way soconaysaa cayrinta ama ka saarida ardayga dugsiga. Mana xadidna muddada ama ma la fidin karo muddada cayrinta ama ka saarida ardayga dugsiga,

4 Ardayga lagu soo oogo cayrinta ama ka saarida muddo ku si ku meel gaar ah, lana siiyo fursad uu dib ugu soo laabto dugsiga ka hor inta la go'aaansan rafcaanka, goorta ardayga u dib ugu laabto dugsiga waxaa laga rabaa in uu dhameystirto shaqada guriga iyo imtixaanada uu ka maqnaa sababta cayrinta,

haddii shaqada guriga iyo imtixaanada ay waxyeeleyso natiijada dhibcaha iyo heerka fasalka ardayga ee simistarka ama saddex- simistarlaha, ama buuxitaan la'aanta shaqada gugiga ama imtixaanka oo la dhameeystiri waayo waxay keenaysaa dhicitaanka iyo in uu ka hor-istaago helitaanka dhibcaha fasalka ama dhibcaha fasalada oo dhan.

Habka Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda[115]

Gudiga Sare Dugsiyada Seattle wuxuu doortay in uu soo dhaweeyo dhamaan ka qaadashada rafcaanka Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda[116]. Haddii ardaygu ama waalidka/wakiilada oo ay ka codsadaan ogeysiiska qoraalka rafcaanka ee Xafiiska Agaasimaha Guud *saddex (3) maalmaha shaqada dugsiga gudahooda looga baahan yahay,* gudiga wuxuu sameeynayaa jadwalka iyo in uu qabto shir muraajacad lagu sameeyo dacwada *toban (10) maalmaha shaqada dugsiga gudahooda looga baahan yahay* ka dib marka la helo ogeysiiska. Ujeedada shirka waxay tahay in lala kulmo ardayga ama waalidka/wakiilada iyo dadka ka wakiil ah dugsiga si muraajaco loogu sameeyo go'aanka sarkaalka dacwada iyo in la ogaado oo la qiimeeyo haddii ay jiraan akhbaaro dheeraad ah oo la tixgalinaayo taas oo bedeli karta go'aanka sarkaalka dacwada. Ardayda dhigata waxbarashada khaaska ah iyo ardayda luqada ku cusubi waxay haq u leeyihiin in qof aqoon u leh itaalkooda ama aqoontooda luqo iyo dhaqankoodu kasoo qaybgalo racfaanka si uu aqoontiisa ula wadaago Guddida Racfaanka.

1. Ka hor shirka, xubnaha gudigu waxay muraajac ku sameeynayaan qoraalka go'aanka ee sarkaalka dacwada.
2. La kulanka shirka gudiga, ardayga ama waalidka/wakiilada (ama la-taliyaha sharciga) waxay xaq u leeyihiin in laga dhegeysto dacwadooda iyo keenitaanka akhbaaro dheeraad ah oo wax ka bedelaayo xaaladaha dacwada, iyadoo fursad la mid ah la siinaayo dadka ka wakiil ah maamulka dugsiga waxay xaq u leeyihiin in ay la yimaadaan akhbaaro dheeraad ah oo cawinaayo go'aanka ee akhlaaqda ardayga. Qofka aqoonya u leh itaalka ardayga ama luqada/dhaqanka ardaygu waxa kale oo uu Guddida Racfaanka siindoonaa warbixin ku saabsan habka ku haboon anshax marinta ardayga.
3. Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda waxay ku raaci karaan go'aanka, bedeli karaan ama dib u habeyn ku sameeyn karaan akhlaaqdarada, cayrinta, ka saarida ardayga dugsiga. Gudiga wuxuu diyaariyaa qoraalka go'aanka waalidka ama wakiilada iyo ardayga toban beri ee maalmaha shaqada gudahooda ee taariikhda dacwada. Go'aanka waxaa gaarikaro oo keliyah xubnaha gudiga oo dacwada dhegeysta ama akhriyey cadeynta daliilka ah, isla markaana aheyn dad markhaati ah, gudiga joogo shirka keliyah ayaa go'aan ka gaaraya iyadoo codbixinta ugu badan lagu go'aansanaayo.
4. Ka qaadashada rafcaanka go'aanka Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda waxay u taal Maxkamada. Haddii cayrinta ama ka saarida ardayga dugsiga goorta ay socoto rafcaanka oo ka qaatay dacwada waalidka/wakiilada ama ardayga waxay ku xiran tahay go'aanka maxkamada ee Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda ilaa mooyee maxkamada ku amarto bedelaad. Gudiga Rafcaanka Akhlaaqda uma baahan in uu siiyo sababaha ku diiday codsiga ardayga goorta ay socoto rafcaanka maxkamada.

## AKHLAAQDA ARDAYGA WAXBARASHADA GAARKA[117]

Guud ahaan, akhlaaqda ardayga waxbarashada gaarka ah waxay raacaysaa sharci la mid ah sharciyadda

Xuquuqda Ardayga iyo Waajibaadka ee Dugsiyada Seattle ee ardayda aan curyaanka aheyn iyadoo loo baahan yahay dib-u-habeyn oo lagu fulinaayo Qodobka Waxbarashada Shaqsiyaadka Ardayga Curyaanka "Individuals with Disabilities in Education Act (IDEA)" ee dowlada isbahaysiga liiska hoose ku qoran.[118]

[62] *See,* WAC 392-400-315 iyo WAC 392-400-320. [63] Qaybtaan waxay quseeysaa ardayda loo qorshayey Qaybta 504. Kooxda SIT oo lagu badalay MDT ay ugu badalaan waajibaadka lagu go'aamiyey dabiicada ardayga lagu qeexaayo curyaanimadiisa 504 Juun 2009 37

[78]Akhlaaq daro lagusoo oogay dabiicada qalifsan oo joogtada ah shaqsi ahaan qodobada sharciga waxbarashada Ardayga Cuuryaanka ah...." 20 U.S.C. § 7151(c).

Cayrinta ama ka saarida deg-dega ah ee waqtiga-gaaban

Qaabka guud ee loola xariiro akhlaaqda, cayrinta waqtiga-gaaban, ka saarida deg-dega ah oo khuseysa ardayga waxbarashada gaarka ah goorta loo qorshaynaayo ficil waxqabad ah ama loo sameyn karo ficil natiijo keeneysa bedelaad waxbarashadiisa (tusaale, in uu lumiyo 10 beri ama in ka badan maqnaashaha maalmaha dugsiga oo isku xigaan ama hab xariir ah ka maqnaashaha dugsiga) ardayga waxbarashada gaarka ah, malagu xukumi karo qorshaha maamulka dabiicada akhlaaqda. Haddii uu jiro qorsho dabiicada akhlaaqda, waa in la raacaa tilaabooyinka qorshaha lana xaqiijiyaa inaanay sidii la rabay ushaqaynayn ka hor inta aan lagu soo oogin cayrinta ama ka saarida deg-dega ah waqtiga-gaaban.

Ganaaxa/Cayrinta

Marka la cayriyo ama laga saaro ardayga waxbarashada gaarka ah dugsiga waa in la tixgaliyaa akhlaaqda lana fiiriyaa oo la raacaa qodobada habkaan: Si loo ogaado cayrinta ama ka saarida keenta natiijada bedelaada ku meeleeynta (tusaale, in uu lumiyo 10 beri ama in ka badan maqnaashaha maalmaha dugsiga oo isku xiga ama hab xariir ah ka maqnaashaha dugsiga). Haddii aysan jirin bedelaad ku meeleynta, waxaa lagu soo oogayaa joojin, haddii ay jirto bedelaad ku meeleyn, maamulka dugsiga waa in isugu yeeraan shirka IEP oo inta badan loo yaqaano Kooxda Muujisa Go'aamada (MDT) kulanka.

Waa in la ogaysiiyaa waalidka/wakiilada baahida isugu yeerida shirka IEP (MDT) iyo raacitaanka habka nabadgalyada ilaalinta sharciga siiyey, kana mid ah xaq u yeelashada ka soo horjeedo waxqabadka akhlaaqda maamulku keenay qaabka dacwada

Waa in la abaabulaa shirka IEP (MDT) ka hor ama 10 beri gudahooda goorta wax laga badalayo meesha ardayga lagu qoray. Ka qaybgalayaasha waxaa ka mid ah waalidka/wakiilada ardayga waxbarashada gaarka ah, macalimiinta waxbarashada caadiga ah, dugsiga degmada dad ka wakiil ah, haddii ay ardayga ku haboon tahay. Qoraalka shirka waa in si buuxda loo dokumintiyaa. Ujeedada shirka waxay tahay in la ogaado dabiicada ardayga uu sameeyey in ay keentay natiijada akhlaaqdarrada ka timid (sababta keentay ama natiijada) ardayga curyaanka ah ama in ay tahay ardayga meeleynta ku haboon, ama ayna ahayn natiijo ka timid tiiyoo la lagu guul daraystay in la meelmariyo qorshaha anshaha ee ku xusan IEP da ardayga.

Waxaa lagu soo oogayaa cayrin ama ka saarida dugsiga haddii ay kooxda ogaato ardayga wax uu sameeyey aysan aheyn mid keentay ama natiijo ka timid curyaanimada ardayga ama natiijo meeleyn ku habooneyn ama ayna ahayn natiijo ka timid tiiyoo lagu guul daraystay in la meelmariyo qorshaha anshaha ee ku xusan IEP da ardayga .

Akhlaaqdaro malagu soo oogi karo haddii kooxda ogaato ardayga waxa uu sameeyey ay ka timid curyaanimada ardayga. Hase ahaatee, shirka IEP waa in la tixgaliyaa oo la isticmaalaa bedelaada ardayga u baahan yahay ee IEP si loo sameeyo barnaamij ku haboon waxbarashada ardyga ama in la hubiyo ku meeleynta. Qorshaha Anshaxa iyo/ama ku qorida Waxbarashada Khaaska ahi waxay ku haboon yihiin sixida

anshaha ardayda.

## Bedelka Aasaaska Waxbarashada Ku Meel-Gaarka

Ardayga waxbarashada gaarka ah waxaa lagu qori karaa bedel aasaaska waxbarashada ku meelgaarka iyadoo aan laheyn IEP ama amar maxkamadeed (1) ilaa ugu badnaan 10 beri; (2) ilaa ugu badnaan 45 beri haddii ardaygu soo qaato buntukh, mindi ama hubka kale khatarta ah ama haysashada, iibinta ama ka ganacsiga mukhaadaraadka sharci darrada ku ah dugsiga ama hawlaha shaqooyinka dugsiga ama uu dhaawac u gaysto qof; ama (3) haddii Qaadiga maxkamadu ku amarto, Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay ardayga wax ugu dhigi doonaan guriga 2 saacadood ama in ka badan todobaadkii waxaana wax baridoona macalin khibrad u leh dhigida Waxbarashada Khaaska ah.

## Waajibaadka Ardayga In oo Helo Howlaha Waxbarashada

Goorta waalidka/wakiilada ay bilaabaan habka dacwada ilaa habka rafcaanka, Degmada waxaa laga rabaa in ay sii-wado hawlaha waxbarashada, mana loo baahno in ay noqoto goob gudaha dugsiga loogu habeeyey. Degmada waxaa kaloo looga baahan yahay in ay bixiyaan hawlaha waxbarashad.

Ardayga dugsiga laga cayriyey ama laga saaray waqti-dheer sabab aan la xariirin dabiicada curyaanimada, iyo ardayga laga cayriyey dugsiga waqti-gaaban horayna looga cayriyey in ka badan 10 beri wadarta isku-geynta sanad dugsiyeedka. Maamulka dugsiga wuxuu qorshaynayaa talo-bixin akhlaaqda dugsi ka joojinta iyo ku qorida macalin ku haboon oo kala shaqeeyo ardayga shaqada guriga iyo dhameystirka mashaariicda dugsiga ee waxbarashada.

Xataa haddii ardayga lagu soo oogo akhlaaqdaro, kana mid ah cayrinta ama ka saarida dugsiga ardayga waxbarashada gaarka ah waa in ay siiwadaan helitaanka waxbarashada gaarka ah iyo hawlaha la xariira oo looga baahan yahay in uu helo waxbarashada bilaashka ah oo ku haboon.

## Qorshaha Maamulka Dabiicada Akhlaaqda

Qorshaha maamulka dabiicada akhlaaqda ama soo dhexgalka qorshaha dabiicada akhlaaqda waa qayb darruuri ah ee IEP ardayga u diidaayo dabiicadiisa in uu waxbarto ama dadka kale. Qorshaha waa in uu ka kooban yahay xeelado ku haboon kana mid ah soo dhexgalka lagu wanaajinaayo dabiicada akhlaaqda. xilliga ardayga waxbarashada gaarka ah uu leeyahay qorshaha maamulka dabiicada akhlaaqda oo lagu soo oogay akhlaaqdaro, qorshaha lagu maamulaayo in la qoro habka ugu muhiimsan loogana jawaabaayo ficilkii dhacay. Arimaha la sameynaayo waa in la soo bandhigaa qorshaha maamulka dabiicada akhlaaqda waa in ardayga lagu qaadaa ficilkiisa iyadoo si gaar ah loo tixgalinaayo arimaha khuseeya ardayga waxbarashada gaarka ah ee kor lagu soo sheegay

SIYAASADA SINAANTA IYO KUDHAQANKEEDA

Dugsiyadda Dadweynaha Seattle wuxuu bixiyaa Fursado Isku Mid ah Dhinaca Waxbarashada iyo Fursadda Shaqaalaynta iyadoon loo kala-soocin midibka barnaamiyada iyo howlaha u adeega waxqabadka sida jinsiyada, caqiidada, midibka, diinta, asalka dalka, da'da, heerka dhaqaalaha, heerka guurka, muuqaalka qofka, dhimirka, jirka ama u dareemka curyaanimad, haweenka uurka leh, xaaladaha ciidamada, indhoolaha hogaayo eeyga la tababaray, ama xoolaha dadka u adeega.  Dugsiyadda Dadweynaha Seattle wuxuu bixiyaa ogolaashaha isku-mid ahaashada dhamaan kooxyaha dhalinyarada loogu talagalay.

Degmadda waxay raacaysaa dhamaan sharciyada iyo qaynuunka Gobolka iyo Is-bahaysiga Dowladda kana mid ah, laakiin la xadidin cinwaanada kala ah: Title IX, Title VI Qodobka Xaqa Dadweynaha, Qaybta 504 Qodobka Dhaqan-celinta, RCW 49.60 "Sharciga Ka Soo Horjeedo Kala Sooca," iyo dhameestirka, laakiin ma'aha mid u xadidan, dhamaan barnaamijyada Degmadda, maadooyinka, waxqabadka, kana mid ah manhajka dheeraadka ah ee waxqabadka, hawlaha, ogolaashaha dhismayaasha iyo iwm.

Shaqaalaha hoos ku xusan ayaa loo xilsaaray in ay gacanta ku hayaan dacwooyinka midab kala-sooca xaq-darada ah iyo su'aaladada:

Gargaar dalbasho

- Iskuduwaha aradayda 504, Carole Rusimovic, (206) 252-0118, crusimovic@seattleschools.org
- Gargaarka dadka waawayn Brent Jones kalkaaliyaha kormeeraha guud waaxda shaqalaysiinta 206-252-0027 bjones@seattleschools.org

Faroxumaynta xaga golmada

- Barbara Nahouaii. Iskuduwaha kumeelgaadhka ah ee Title IX 206-252-0367 TitleIX@seattleschools.org

Midabkala soocyada kale oo dhan

- Arimaha ardayda; Larry Dorsey, (206) 252-0707, ladorsey@seattleschools.org
- Arimaha dadka waawayn; Brent Jones kalkaaliyaha kormeeraha guud waaxda shaqalaysiinta 206-252-0027 TitleIX@seattleschools.org

Cinwaanka Adareeska:  Seattle Public Schools, P.O. Box 34165, Mail Stop 33-157, Seattle, WA 98124-1165.

Lifaaqa A

ARJIGA DHEXDHEXAADINTA DAROOGADA IYO KHAMRADA

MAGAC _____________________________

DUGSI ______________________________

Dhexdhexaadintan waxaa lagu gaadhay kulan lala yeeshay ardayga iyo waalidka/wakiilka ka dib markii ardayga lagu soo dacweeyey inuu jabiyey xeerka E-121 oo ah inuu Daroogo mabnuuca qaybinayey iyo walxo aan la ogolayn, E-122 oo ah inuu Khamro la cabo qaybinayey, E-131 oo ah haysasho ama isticmaal daroogo mabnuuca iyo walxo aan la ogolayn ama E-132 oo ah haysasho ama isticmaalid khamro.

1. Dugsigu wuxuu ogolaaday arimahan hoos ku xusan:
   a. Eedaynta iyo sharaxaada arintani waxay noqonayaan sida hoos k xusan:
      - ☐ Eedayn ma jirto
      - ☐ Erayada lagu sharaxayo arintan waxa loo badalay sida hoos ku xusan:

      _________________________________________________________________

      _________________________________________________________________
   b. Si loogu badalo ganaaxa cayrinta dheer ee jebinta xeerarkan E-121, E-122, E-131 ama E-132 maalmah ka bacdi markii la helay xaqiijin ah in ardaygu uu leeyahay balamo uu khabiirka degmada u qaabilsan ka hortaga daroogadu ku qiimaynayo ogolaadayna inu hirgaliyo wuxuu khabiirku usoo jeediyo:
      - ☐ Cayrin gaaban oo ah __________ maalmood.
      - ☐ Cayrin dheer oo ah __________ maalmood.
   c. Dugsigu waxa kale oo uu ogolaaday inuu bedelo warbixinta ku qoran shabakada eSIS kuna bedelo heshiiskan iyo inuu isbedelka waalidka/wakiilka ku siiyo sadex maalmood gudahood.
2. Ardayga/waalidka/wakiilku waxay ogolaadeen arimahan hoos ku xusan:
   - ☐ Inuu baadhitaan ardayga kusoo sameeyo Khabiir Degmadu ogoshahay oo ku takhasusay daroogada, kharashkana waalidku bixiyaan.
   - ☐ Inay talooyinka khabiirku siiyo sidooda u hirgeiyaan.
   - ☐ Sign releases to allow the school to exchange information with the assessor.
3. Shuruudahan dheeraadka ahna waa lagu xidhi karaa:

   _________________________________________________________________

   _________________________________________________________________

   _________________________________________________________________

Saxeexa dugsiga, ardayga, waalidka/wakiilku wuxuu muujinayaa inay ku qanceen heshiiska dhexdhexaadinta oo dhamaan arimaha la xidhiidha dacwadani ay dhamaad yihiin, oo aanay ardayga, waalidka/wakiilku racfaan la xidhiidha dacwadan qaadan karin.

Hadii ______________________________________ ay dhaqan galin waayaan shuruudaha ku xusan heshiiskan dhexdhexaadinta, dacwadii hoe iyo xukunbeedii ayaa lagu noqonayaa.

| | |
|---|---|
| ________________________________ | ____________________________ |
| Maamulaha Dugsiga | Ardayga |
| ________________________________ | ____________________________ |
| Taariikh | Waalid/Wakiil |

Lifaaq B

WAXAA DHEXDHEXAADIN LAGA GALAY ________________________

Taariikh: ________________________

Heshiiskan dhexdhexaadinta waxaa lagu gaadhay racfaankii dacwada ee la qabtay taariikhdan. Dhinacyadu waxay ku heshiiyeen inay ku dhaqmaan shuruudahan hoos ku xusan:

1. Dugsigu wuxuu ogolaaday in dembiga lagu soo oogayo iyo sida loo sharaxayo arintani ay tahay sida hoos ku xusan:[6]

   ______________________________________________________________________

   ____________________________________________________________

2. Dugsigu wuxuu ogolaaday inuu hirgeliyo arimahan hoos ku xusan:

   ______________________________________________________________________

   ______________________________________________________________________

   ______________________________________________________

3. Ardaygu wuxuu ogolaaday inuu hirgeliyo arimahan hoos ku xusan:

   ______________________________________________________________________

   ______________________________________________________________________

   ______________________________________________________

4. Shuruurdahan dheeraadka ahna waa lagu xidhi karaa (goobaab kuwa laysla ogolaaday):
   a. Ardayga waxaa laga soo gudbinayaa warbixin ku saabsan horumarkiisa oo todobaadle ah ilaa __________________.
   b. Ardaygu wuxuu muujin doonaa akhlaaq wanaagsan, danbi bambe oo kan la midana kuma galidoono fasalka ama dugsiga.
   c. Ardaygu wuu galidoonaa dhamaan fasaladiisa, wakhtigooda. Ardaygu shaqada fasalka ayuu ka shaqayndoonaa isagoo u diyaara. Hadii uu xeerarkan jabiyo waxaa lagu qaadi doonaa ____________________________________________.

Hadii ____________________________________ ay dhaqan galin waayaan shuruudaha ku xusan heshiiskan dhexdhexaadinta, dacwadii hoe iyo xukunbeedii ayaa lagu noqonayaa. Saxeexa ardayga, waalidka/wakiilku wuxuu muujinayaa inay ku qanceen heshiiska dhexdhexaadinta oo dhamaan arimaha la xidhiidha dacwadani ay dhamaad yihiin, oo aanay ardayga, waalidka/wakiilku racfaan la xidhiidha dacwadan qaadan karin.

| | |
|---|---|
| ______________________________________ | ________________________________ |
| Kalkaaliyaha Maamulaha | Arday |
| ______________________________________ | ____________________________ |
| Sarkaalka Dacwada ama markhaatiga | Waalid/Wakiil |

[6] Hadii dacwada iyo/ama qaybta warbixinta NDA sideeda tahay, qor "Isbedel ma jiro". Isbedelka warbixinta waa in lagu qoraa shabakada eSIS laguna bedelo heshiiskan waalidka/wakiilka na la siiyo nuqul sadex maalmood gudahood.